UN-HABITAT

Barnaamijka Degsiimada Aadamaha ee Qarammada Midoobay



8. Xildhibaanka G/degaanka oo ah Mas'uul Maaliyeed

Taxanaha Tababarka

Komishanka Yurub



Xildhibaanka G/degaanka oo ah

Mas'uul Maaliyadeed

Tilmaame-bare 8

Tababarka Hoggaanka la Doortay

Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (HABITAT)

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tilmaame-baraha 8aad

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Tarjumaddii: Jaamicadda Camuud

Istanbuul, 1996kii "Shir-madaxeedkii Caasimadaha"

Taxanaha Agabaka Tababarka

Sawirrada waxa iska leh Joel Elrod,
Naqshadda iyo jaan-goyntana Vicki Gillette

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

HS/714/04SO

HORDHAC

Sida lagu muujiyey natiijooyinka qiimaynta baahiyaha tababarka ee ay qabatay Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (Habitat), baahiyaha tababarka ee khuseeya madaxda (Xildhibaannada) la soo doortay ee Dawladda Hoose, ama se siyaasiyiinta gudaha, waxa loo arkaa inay ku jiraan arrimaha caalam ahaan ugu muhiimsan, isla markaana, ugu danaynta yar dhinacyada dhismaha wax-qabadka ee horumarka Dawladda Hoose iyo maamulkeeda.

Sannadihii yaraa ee ugu danbeeyey, tiro dalal kala duwan ah, sida Nepal iyo Polland ama Uganda iyo Paruguay ayaa ku tallaabsaday markii ugu horreysay muddo tobanaan sano ah, meelaha qaarna weligood markii ugu horraysay, hawsha doorashada Xildhibaannadooda Golaha Degaanka iyo Duqaydooda magaalooyinka. Baahiyaha tababarka ee madaxda la soo doorto ee Dawladda Hoose waxay xagga sare ugaga jiraan ajendaha dimoqraadiyadaha cagaha loo taagay/dhismay, sida Ecuador, India iyo dalka Marykanka (USA).

Si wax looga qabto baahiyahan, Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (HABITAT) waxay hore u dhigtay oo ay tijaabisay taxanayaal buugaag Tilmaame-barayaal ah oo tababarka ku lug leh si ay uga taageeraan Xildhibaannada Golaha Degaanka in ay ka wakiilo noqdaan muwaadiniinta, siiyaan hoggaaminta loo baahan yahay magaalo iyo dad ahaan ba, si hawl-karnimo leh ula shaqeeyaan Dawladda Dhexe iyo maamulka, farsamo-yaqaannada iyo xirfadlayaasha sare ee shaqaalaha Dawladda Hoose iyo hay'adaha la hal-maala. Tilmaame-barayaashani waxay sharxayaan siyaasad iyo go'aan-qaadasho, is-gaadhsiin, gorgortan iyo hoggaamin, ka-qayb-gelidda, agaasinka iyo hagidda shiraraka, xilalka karti-gelineed iyo fududeyneed ee Xildhibaanka Golaha Degaanka, maamulka maaliyadeed iyo arrimaha kale ee la hal-maala.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tilmaame-barahan, Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed, wuxu ka mid yahay taxanayaal 12 ah, waxaana loogu talog-alay bilow ahaan in ay adeegsadaan tababarayaasha hay'adaha tababarka waddaniga ah ee Dawladda Hoose ama se unugyada/waaxaha tababarka ee ku dhex yaal Dawladaha Hoose. Si ay ugu noqoto taageero dheeraad ah tababarayaasha adeegsanaya Tilmaame-barayaashan, Xarunta QM ee Degsiimada Aadanuhu (HABITAT) waxa kale oo ay soo daabacday buug kale oo kaabaya ama lammaane/wehel u ah taxanahan Tilmaame-barayaasha ah. Buuggan la yidhaa "Tusaha Tababaraha ee Tababarka Saraakiisha la soo doorto" oo ka kooban qoraallo tababaraha khuseeya iyo macluumaadba, waxa loogu talo-galay in tababaruhu uga faa'iidaysto qorshaynta aqoon-is-weydaarsiyada Saraakiisha la soo doorto ee ku salaysan Tilmaame-barayaashan.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Waxaan filayaa in Tilmaame-barayaashani si weyn wax uga tari doonaan xoojinta dhismaha awoodda wax-qabad ee Dawladaha Hoose, dhinaca unkidda dhaqammada hoggaaminta wacan, kuwaas oo ka mid ahaa ujeeddooyinkii waaweynaa ee 1996kii Shirweynihii Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha, Habitat II.

Waxaan u mahad-naqayaa Dr. Fred Fisher iyo Mudane David W.Tees kaalintii ay ka qaateen diyaarinta Tilmaame-barayaashan iyo kuwo kale oo ku jira taxanayaashan, iyaga oo la kaashaday shaqaalaha Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (HAABITAT) Qaybta Tababrka ee ka tirsan isla Xaruntaa QM oo ay taageero u fidisay Dawladda Netherlands. Waxa kale oo aan rabaa in aan xuso talooyinkii iyo tilmaamihii ay ku darsadeen Tabarayaasha iyo madaxda Dawladda Hoose ee Costa Rica, El Salvador, Kenya, Lithuania, Romania iyo Uganda ee naga caawiyay tijaabintii goobeed ee Tilmaame-barayaashan.

Dr. Wally N'Dow
Kaaliyaha Xoghayaha -Guud
Xarunta Qaramada Midoobay ee
Degsiimada Aadanaha (Habitat)

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-du, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxa ka hawl-galay koox tarjumadda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka, Jaamicadda Hargeysa iyo Jaamicadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxa mudan Akaademiga Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysiinta Tilmaame-barayaashan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

HALKA UU KAGA JIRO TILMAAME-BARAHAN

Sida loo isticmaalayo Tilmaame-barahan 5

Qaybta 1aad

Qormo ku saabsan Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Qeexid 5
Soo-ururin 5
Milicsi 5
Aragtiyaha iyo fikradaha 6
Miisaaniyad-dejin: Hannaan cilladaysan 7
Tub cusub 9
Hilaadinta Miisaaniyadda 10
Laba arrimood oo werwer leh 11
Milicsi 12
Dhacdooyin wax-ka-soo-qaad leh 14
Fikrado baahsan oo ku saabsan hawl-galka iyo dayac-tirka (S&D) 14
Milicsi 15
Siyaasadda Maaliyadda 16
Siyaasado maxay ah? 17
Xaaladdiina Maaliyadeed waa sidee? 17
Tilmaamayaal dakhli 18
Tilmaamayaal kharash-galka 19
Tilmaamayaal kale oo dhiillo-sheeg ah 20
Ma dhaqaale-darro ayaa idin ku soo fool leh? 20
Tusayaal Ah Akhrinta Bayaanada Maaliyada 21
Tilmaamayaal Muhiim ah 23
Raadraac 24

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Qaybta 2aad

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Aqoon-is-weydaarsi: Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu yahay Xooleeye

Guud Mar 27
8.1 Layli xiiso gelin ah: Ra'yi is-weydaarsi 30
8.2 Waayo-aragnimo Wadaag: Kuma ayaa qabray Wax? 31
8.3 Cashar-bixinta (Bandhiga) Tababaraha 36
8.4 Xaalad Dersid: Qiimeyn Siyaasad Cashuureed oo aan u-la-kae-ahayn 37
8.5 Layli: Qiimayn Xaaladda Maaliyadeed 40
8.6 Layli: Lafo-gurista Bayaanka Maaliyadeed 45
8.7 Layli Xirfad gudbinta 48

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

SIDA LOO ISTICAMAALAYO TILMMAAME-BARAHAN:

Tilmaame-barahan saameeya “Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Ma’uul Maaliyadeed”, sida kuwa kale ee taxanahan ka midka ah, waxa loo isticmaali karaa siyaabo dhowr ah.

Diraasad kuu gaar ah:

Qormada Tilmaame-barahan bilowga u ah waxa loogu talo-galay in qof kastaa isagu is-baro. Waxa qudh ah ee aad u baahan tahay waa meel aan buuq lahayn, oo aad ku fekerto, in waqti ah, iyo wax aad wax ku qorto. Si aad natiijo wanaagsan u gaadhid, waxaannu kugu dhiirri-gelinaynaa in aad ka jawaabtid su’aalaha hadba lagu weydiiyo. Qiimahaaga aqooneed ee warku dhawr jeer ayuu u sii laban laaban karaa akhristaha waqti ku qaata in uu tan sameeyo.

Tababarka aqoon-is-weydaarsiga:

Qoraalka Tababababaraha iyo agabka layliyada ee Tilmaame-barahan waxa adeegsan kara, tababare waayo-aragnnimo u leh tababar hawleedka lagu tababaryo xildhibaannada Golayaasha Degaannada ee kala duwan. Waxaannu ku biirinnay hawlo barasho iyo qaabab siiya tababarha, jajabnaan dheeraad ah si uu tababar-hawleedka u waafajiyo baahiyaha Xildhibaannada ka qayb qaadanaay. Dejinta Tilmaame-barahan danta aanu ka lahayn waa in aannu kugu dhiirri-gelinno in aad ku dartid waayo-aragnimadaada tababarennimo si aad kor ugu qaaddo qiimaha barasho ee Xildhibaannada tababarrada ka qayb-qaadanaya.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Adiga oo tababare ah waxaad go’aamin kartaa in aad u adeegsato agab tilmaamaha sida ay u kala hormaysan yihiin iyo habke la soo ban-dhigay. Hase ahaatee, haddaad doonto dib-u-habayn iyo wax-ka-bedelba waad ku samayn kartaa agabka si baahiyaha iyo muraadka laga leeyahay loo wafajiyo xaaladda tababar kasta gaar ahaantiisa. Wax aad dooran kartaa in aad bixiso saddex saacadood oo tababr ah, adigoo isticmaalaya layliyada iyo hawl-qabadyada tilmaamaha. Ama waxaad ka faa’iidaysan kartaa waxyaalahan badan ee tilmaamaha adigoo ku kaabaya waxyaalo ay aqoontaadu ku siiso, si aad u gaadhsiiso mudada barnaamijka maalin dhan.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Tilmaame-barahani wuxuu ka mid yahay taxane 12 ah oo loogu talo galay hoggaaminta la doortay. Waxaad go’aansan kartaa ama lagaa codsan karaa in aad fuliso tababar hawleed u baahan in aad adeegsato tilmaamayaal mid ka badan ama 12ka tilmaame oo dhanba muddo ka dheer waqtigii mid loogu talo-galay iyadoo tilmaame kastaa gaar ahaantiisa loo isticmaali karo, wax weyn bay kordhin kartaa haddii loo gudbiyo siday u kala horreeyaan, barasha ku dhafan waayo-argnnimada xildhibaannada ka-qayb galayaasha.

Tababar-kooxeedka:

Sida doorbidan wax yaalahaas waxa kale oo lala isticmaali karaa, taageerada tababare ama hage wayo-arag ah, si kor loogu qaado wax-qabadka xildhibaannada u wada adeega is-maamul keliya. Marka la tababrayo xildhibaanno wada shaqeeya waxaannu rumaysan nahay in hagaha tababar ku uu diyaaar u yahay in uu si kale u abaabulo hawwlaha tababar ee tilmaamahan. Waxa jiri kara waqtiyo adigoo fududeeyayaasha ah aad doorbiddo in aad ku kordhiso hawlo kale kuwaas oo ay keeni karaan xaaladaha iyo tilmaamaha kooxdu.

Waxaannu ku rajo weynannahay xaaladdu la mid tahay markay kula kulmaan in aad tilmaamahan baro u adeegsatid sanduuqa baanadaha tilmaamahan bare waxa ku jira doorashooyin aaraa' tababar oo laysku dari kara, bar-bar dhigi karo, la beddeli oo la iska tuuri karo, hadba xaaladaha ta ku habboon. Doorashooyinkaas faraha badani oo aad ka dooran karto tilmaamayaasha tababarba. Waxaannu kuu rajaynaynaa si buuxda uga faa'iidaysanaysid.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

3

Qaybta 1aad

Qormada

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Qeexid

Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed, wuxu qaataa go'aammo la xidhiidha ururinta, qoondaynta iyo kharash-galka.

Soo-ururin

Qormadani daymo dul ilaa hoos ah ayay ku eegaysaa xilalkaaga Xildhibaannimo ee hoggaaminta ku koobaya xaaladda maaliyadeed. Waxa ka mid ah qodobbada gaarka u ah doorka maaliyada dawladda hoose, qorhe-hawleedka maaliyadda iyo isbedel-marxaladeedka maaliyadda dadweynaha ee aan kaafin karin. Waxa kale oo ku jira sida loo qiimaynayo xaaladda maaliyadeed, meelaha curyaaminaya maaliyadda iyo qodobbada kale ee dhibaatayn kara sida maal-gelinta raasa-maalka (capital investment) iyo sida looga shaqeysiin karo farahana loogu hayn karo.

Milicsi

Marka aan ka fekero anigu doorkayga Mas'uul Maaliyadeed oo ka mid ah xilalkayga Xildhibaanimo waxa igu soo dhaca waxyaabaha soo socda:

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

1. _____
   _____
   _____
2. _____
   _____
   _____
3. _____
   _____
   _____

Qormo

Aragtiyaha iyo fikradaha

Woodrow Wilson, oo ka doodaya maaliyadda dadweynaha dabayaaqadii qarnigii 19 aad, wuxu yidhi: “Shaqooyinka dawladdu way fudud yihiin maxaa yeelay nolosha laf ahaanteed oo fudud ma jiro hab adag oo loo ururiyo dakhliga dadaweynaha iyo deynta dadweynaha oo wareeriya Mas’uulka Maaliyadeed, sidaa darteed ma jiro Mas’uul wareeraa.”

Haddaan ereyadaa Wilson sidooda u qaadanno oo aan fikraddiisa in yar qiyaasno, waxaan u qaadan karnaa in ay jiraan qaar wareersan, ama khal-khalsanba oo ah mas’uuliinta maaliyadeed ee Dawladda Hoose. Dabcan magaaladayda kama jirto sidaasi oo kale, laakiin laga yaabaa in ay ka jirto kuwa ina xiga. Qaybtani waxay ku jihaysan tahay Xildhibaannada u adeega magaalooyinka kugu xiga, laakiin waad ka qayb geli kartaa.
Marka hore qiraal. Mowduucani waa mid aad u balaadhan, waanay yar adag tahay in laga wada hadlo marka la eego murugsanaantiisa. Kol haddii aynu doonayno in aan nidhaahno wax wax-ku-ool-ah, oo sida aynu filayno faa’iido leh, waxaynu isku koobi doonnaa dhowr qodob oo aynu rumaysan nahay in ay xuddun u yihiin xilkaaga ah mas’uulka maaliyadeed ee mujtamaca. Laakiin inta aynaan gudo-gelin aan si kooban u eegno waxyaabaha ay ku kala geddisan yihiin lagu na kala sooco maaliyadda Dawladaha Hoose iyo hay’adaha kale sida kuwa aan macaash-doonka ahayn iyo kuwa gaar ahaaneed. Qaar idin ka mid ahi waxa laga yaaba in ay leeyihiin waayo-aragnimo maaliyadeed oo ay ka heleen ururro ama hay’ado kale. Haddii aad leedahay waayo-aragnimo waxa aad kuugu muuqanaya faraqa u dhexeeya labadaa. Halkan waxa ku taxan dhawr faraqyadaas ah oo maankaaga deg deg ugu soo dhacaya.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

1. Ma jiraan kheyraad ama dhaqaale dabooli kara baahiyaha la garanayo iyo kuwo la doonayo ee muwaadiniinta;

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

2. Baahiyaha, mudnaanta iyo awoodda muwaadiniinta ee ay adeegyada loo sameeyo lacag ku bixin karaan way kala duwan tahay;

3. Isku dayga in la qorsheeyo oo la qiimeeyo baahida adeeg kasta iyo sida ay isugu xidhan yihiin oo aad u adag amaba aan suuragal ahayn .

4. Biroqraadiyada sare ee dawladu waxa ay culays iyo caqabadba ku yihiin go’aamada aad ku gaadhaan dawaladaha hoose oo si togan iyo si tobanba (for better or worse) saameyn ugu leh madaxbanaanida aad ku go’aamin kartaan waxa ugu haboon dadweynaha .

5. Inkasta oo aad si fiican u garanaysaan baahiyaha guud ee bulshada, haddana waxa adag isku dheeli tirka baahiyaha wakhtiga fog iyo kuwo dhow gaar ahaan xilliyada tartanka dooroshooyinka .

6. Looma hayo wakhti iyo khayraad (dhaqaale iyo cilmi) toona oo lagu darso lagu na kala saaro qiimaha iyo manafacaadka ay leeyihiin tabaha ka ga haboon kuwa ku kaca kharashka badan fulintooduna adag tahay .

7. Malaha waxa ugu adag sida aad isugu dheelitiri lahayd aragtidaa sida wax loo ga qabanayo bulshadaada iyo arjiyada saaxiibadaada ku gu la jira golaha .

Musbaar keliya lama sudhi karo wax walba.

Maahmaah Ruush ah

Qodobbadaa aan soo xusnay oo dhami kaalintaada Mas'uul Maaliyadeed waxay ka dhigi karaan ka ugu adag ee ugu wareerka badan. Waxa kale oo ay tahay ta ugu mudan xilalkaaga maadaama ay qasbayso in adiga iyo saaxiibbadaa ay go'aansadaan sisda loo qorshaynayo isla markaana loogu takri-falayo dhaqaalaha iyo kheyraadka guud. In kasta oo kaalinta Mas'uulka Maaliyadeed ay la xidhiidho wax-qabad baaxad leh oo u baahan in sannadka oo dhan laga war hayo, haddana miisaaniyadda ayaa ah ta waqtiga iyo dedaalka ugu badan ay ku qaataan Xildhibaannadu. Taxanaha Tilmaame-barayaasha Saraakiisha la soo doorto, ee lagu daabacay Mareykanka ay daabacdayna Hay'adda 'International City Management Association' (Kulanka Caalamiga ah ee Maareynta Magaaladu), waxay qorayaashu ku sheegeen in miisaaniyaddu tahay ta ugu mudan hawl-sannadeedka Xildhibaannada. Qorayaashu waxay ku faah-faahiyeen xaqiiqdan iyaga oo yidhi:

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

"Miisaniyad-dejintu waa meesha dhammaan Xildhibaannada la soo doorto ee Dawlada Hoose ay qasab ku tahay in ay si wadajir ah ugu hawl galaan una soo saaraan wax ay ka midaysan yihiin; miisaaniyaddu waa meesha lagu go'aamiyo mashaariicda la maal-geliyo; miisaaniyaddu waa meesha lagu cayimo dejinta siyaasadda Dawlada Hoose. Miisaaniyadu waa meesha lagu jeexo khadka maamul ee ay raacaan madaxda waaxaha fuliya adeegyada; miisaaniyaddu waa halka laga qiyaaso wax-qabadka sannadaha soo socda; miisaaniyaddu waxay u bandhigtaa yoolalkaaga iyo go'aammadaada kooxo badan oo ay ku jiraan muwaadiniinta, ganacsatada gudaha iyo dibadda, iyo hay'adaha amaahda bixiyaa."

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Miisaaniyad-dejin: Hannaan cilladaysan

Habka miisaniyad-dejinta waxa badan baa ka si' ah gaar ahaan Qaybta Dawlada. Bal tan aan sharaxno. Had iyo jeer waxa la yidhaahdaa nidaamka Dawladdu u dejiso miisaaniyaddu wuxu ku dhiirri-gelayaa madaxda Dawladda in ay hanti badan lumiyaan (khasaariyaan). Qof kasta oo ka ag dhawaada xafiisyada Dawlada Hoose dhammaadka sannad-xisaabeedka wuu ka marag kacayaa arrintan. Waa waqti buuq iyo orod badan oo madaxda iyo shaqaalaha oo xammaysani ku dedaalan in ay kharas-gareeyaan wixii u qoondeysnaa inta aan waqtigu ka dhicin.

Qormo

Thomas Anton oo wax ka qoray Siyaasadaha Dawladaha ee kharash-galku wuxu soo bandhigay tilmaamahan, ama aynu nidhaahno talo-bixinahan ku jihaysan tix-gelinta madaxa waaxda marka uu isu diyaarinayo miisaaniyad-dejinta sannadka (Waxaanu tuhunsan nahay in taladani sidaas oo kale ay qabanayso habka maal-gelinta ee Dawladiinna Hoose).

- Kharash garee wixii kuu qoondaysnaa oo dhan. Ka baaqashadeedu waxa ay muujineysaa in marka hore ba aan loo baahneyn cadadkaas oo dhan, oo si dadban u tusaysa in la dhimo miisaaniyada sannadka soo socda.
- Ha dalban inka yar wixii laguu qoondeeyey. Waxa kaaga fudud in aad hesho si aad u isticmaasho wixii kuu qoondaysnaa halka aad sharaxaad ka bixin lahayd in kharashka lagaa dhimo.
- Ku dar mashaariicda ugu mudan miisaaniyada aasaasiga ah. Badanaaba xildhibaanadu ma diidaan mashaariicda qayb ka ah kuwa shaqeeya.
- Korodhka u muuji in uu yar yahay, oo faahfaahin ka bixi in uu korodhka ka dhashay mashaariicdii hore u jirtay.
- Sii fursad duqa iyo xildhibaanada ay ku dhimaan miisaaniyada. Tani waxay u ogaalaanaysaa in ay badbaadiyaan lacag (kharash) ayna u sababeeyaan doodooda kobcinta dhaqaalaha dawladda hoose. Qaybta ay dhimeen waxay ka jeedineysaa miisaaniyada aasaasiga ah iyo mashaariicda lagama maarmaanka ah.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Qodobadaasi bidhaamiyey sida loo khasaariyo lacagta cashuur bixiyayaasha waxay noqon lahaayeen wax lagu maadsado ama lagu qoslo haddii aanay ahayn sawirka dhabta ah ee dawladaha hoose ee aduunka marka sannad-miisaaniyadeedku soo dhawaado. Mujrimka meesha ku jiraa sida qaalibka ah waa habka madax-kharasheedka miisaaniyada (line-item). Dariiqadan maareynta maaliyada waxa loo sameystey in lagu dabo-galo (control) madaxda iyo shaqaalaha dawlada oo doc kastaba laga ilaaliyo in aaney isticmaalin shilin aanay u qoondayn madax-kharasheedka xildhibaanadu. Kol haddii ay adag tahay in madax-kharasheedyada la isku wareejin (rari) karo si loo daboolo baahiyaha iyo dhibaatooyinka soo kordha, madaxdu laba-dible ayey u xidhan tahay. Nidaamkii loo abuuray/sameeystay in uu maanaco (joojiso) maamul xun ayaa ka dhigay maamul-wanaag mid aan suurto-gal ahayn.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Habab kale oo miisaaniyed-dejin ayaa la sameeyey laakiin midkoodna si fiican uma shaqeeyo. Way se haboon tahay in sida ugu gaaban loo xuso hababkaa kuwooda ugu caansan. Waxa ugu horeeya miisaaniyad-mashruuceed (programme budget).

Habkani wuxu qoondeeyaa kharash hawlaha ama shaqooyinka la qabanayo sida faro-ku-haynta jidadka, ururinta iyo fogeynta qashinka iyo nadiifinta jidadka. Miisaaniyad-mashruuceedka waxa lagu xoojiyaa miisaaniyad madax-kharasheed (sida ay u badan yihiin hababkani), laakiin waxa la muujiyaa shaqooyinka hanti lagu kharash gareynayo. Laba dhibaato oo habkani leeyahay waa:

b) Muddada ay qaadanayso in la qorsheeyo lana fuliyo.

t) La'aanta heerar adeeg oo qayaxan ama wax-qabadka la rabo in la gaadho.

Qormo

Dhibaatadan dambe waxa loo qaadan karaa in xal loo helay markii la soo saaray miisaaniyad-fulin-hawleed (performance budget). Miisaaniyadda noocani waxa laga soo dheegtay misaaniyad-mashruuceeda oo ay dheer tahay muujinta xidhiidhka (ka dhexeeya) kharashak iyo hawsha lagu fuliyey. Madaxda waxa laga rabaa in ay si cad u qeexaan maxsuulka (output) iyo muga shaqada unug (waax) kasta (tusaale, inta kiloomitir ee jidka la nadiifinayo iyo qiimaha kilo-mitirkiiba). Ku dhaqanka habkani wuu dhib badan yahay gaar ahaan marka lagu dabaqo shaqaalaha qaarkood iyo qaybaha adeegyada bulshada.

Tub cusub

Tubtan cusub ee maaliyad-dejinta dawladdaha hoose waxa ay tixgelin weyn ka heshay Waqooyiga America iyo Yuurb. Tubtani waxay madaxda u sahashay in ay u baajiso kharashka aaney ku isticmaalin hadafkoodii sannadka gudihiisa in ay ku fushan karaa sannadada soo socda oo aanay dib ugu celin khasnada si dib loogu qoondeeyo. (Account) kharash (fund) guud ah ayaa la furayaa, kii madax-kharasheedkana waa la xidhayaa inkasta oo madaxdu ay heysanayaan miisaaniyada madax-kharasheedooda si ay ula socdaan waxay kharash galeeyeen. Inkastoo ay suuragal tahay in aan nidaamkan laga hirgelin Karin wakhtiga dhow, laakiin waxa xiiseyn kara xildhibaanada la doortay ee u heelan nidaam kooda ka wanaagsan oo lagu shaqeeyo. Magaaladii ugu horeysey ee nidaamkan qaadatay waxay ku taalaa gobolka Kalifoorniya ee Mareykanka. Maareeyaha magaalada ayaa bilaabay nidaamkan isagoo raacaya tilmaamo iyo talooyin uu soo jeedeyey kaaliyaha agaasimaha maaliyada oo markiisii hore ka guurey Filibiin oo uu ka shaqayn jiray baanka. Markii magaalo labaad oo xigtay ay ku dhaqan tay nidaamka, waxa habkan lagu naaneysay miisaaniyad-dabarka kharashka (Expenditure Control Budget).

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Madaxda magaalooyinka u qaatay nidaamkan cusub miisaaniyada-sannadeedka iyo maareynta ayaa yidhaahda faa'iidooyinka nidaamkan lama soo koobi kari. Waxaana ka mid ah:

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

- ∉ Sii qof kasta oo shaqaale ah abaal-marin si uu u badbaadiyo hantida (u dhimo kharashka)
- ∉ Kheyraadka u qoondee si loogu tijaabiyo fikradaha cusub.
- ∉ In madaxda loo gacan-banneeyo la jaan-qaadka xaaladaha is-beddelaya.
- ∉ La sameeyo degaan la malayn karo.
- ∉ Si weyn loo fududeeyo habka miisaaniyada.
- ∉ La keydiyo kharash badan oo ku baxa hanti-dhawrka iyo shaqaalaha miisaaniyadda dejiya.
- ∉ In hoggaanka la doortay loo madax-banneeyo sidii ay diiradda u saari lahaayeen shaqada muhiimka ah.

Waxa la rajeynayaa in habkani uu sii hirgeli doono oo ay qaadan doonaan Dawladaha Hoose ee dalal badan oo adduunka ah si aan uga libin keeni karo khasaaraha tudhis la'aanta ah ee habka miisaaniyada madax-kharasheedka. Hadda se bal dib u akhri qodobbadii aan hore u soo taxney ee ku saabsanaa sida madaxda maashaariicuhu ku cadayn karaan si loogu

qanco baahidood maaliyadeed.

Kuwani waxay kaa caawinayaan sidaad uga feejignaan lahayd sida ay madax-waaxeedyadu u dhaqmayaan. Haddaba, dabacan, haddii aad dhiirigeliso dhaqamada noocan ah, waa inaad fiiro u lahaataa dabeecadaada.

Hilaadinta Miisaaniyada

Waxa kaliya ee ugu muhiimsan ee ka soo baxa habka maareynta maaliyadda waa xog sugan. Xog sugan la'aanteed Xildhibaannadu ma qaadan karaan go'aammo sax ah, madaxduna uma maamuli karaan si tayo iyo wax-ku-ool leh. Si loo helo xog sugan Dawladaha Hoose waxa ay u baahan yihiin in ay abuuraan dhawr hab iyo nidaamo loo ururiyo loona lafa-guro macluumaadka (data). Nidaamyadan iyo hab-raacyadani marka ay isku xidhan yihiin waxay sameeyaan wax aynu ugu yeedhi karno Habka macluumaadka isku dhafan ee maaliyadeed. Xuddunta nidaamkani waxa weeyaan mashaariicda, xisaabaadka maaaliyadda, daraasada iyo lafo-gurida maamulka. Xudduntaa waxa ku soo arooraya tiro qodobbo ah oo xasaasi ah, qaarkood is-daba joogaan, qaarkoodna meerto yihiin oo ku slaysan dhacdooyinka bilaha sannadka (fiscal calendar events). Waxaana loo kala jejebin karaa afar qaybood oo kala soocan:

1. **Yoolal & ujeeddooyin:** oo koobaysa dib-u-hubinta baahiyaha bulshada, hawlihii hore loo qabtay iyo kala hormaynta baahiyaha.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

2. **Qorshaynta & Miisaaniyad-dejinta:** oo ay ka mid yihiin dejinta qorshayaasha dhaqaale ee sannadka, oddoroska dakhliga iyo diyaarinta miisaaniyadda iyo ku-dhaqankeeda.

3. **War-bixinta & kormeerka:** is-barbar-dhigga kharash-galka qorshaysan iyo ka caadiga ah, kormeerka wax-qabadka waaxyaha iyo mashaariicda, iyo tallaabooyin lagu toosinayo halkii looga maarmi waayo,

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

4. **Qiimeyn: I**n lagu sameeyo baadhis hanti-dhawr maaliyadda iyo hawl-fulintaba, lana qiimeeyo mashruuca,

Qodobbada koowaad & afraad waxa lagaga hadlay labada Tilmaame-bare ee kala ah:

b) Siyaasad-dejiye oo ka saabsan hawlaha iyo waajibaadka lagu qeexay yoolalka iyo himilooyinka,

t) Kor-joogaha oo diiradda saara kormeerka iyo qiimeynta xilalka. Halkan ku gudo-geli meyno qodobbadan ee waxaad ka hlei Tilmaame-barayaasha kale ee taxanahan.

Laba arrimood oo werwer leh

Marka lagu gudo-jiro marxaladda qorshaynta iyo miisaaniyad-dejinta ee habka xog-maaliyadeedka isku-dhafan laba qodob ayaa saameyn ku yeesha Dawlada Hoose oo badan, gaar ahaan kuwa waddammada soo koraya. Waxaanay kala yihiin.

b) Maalgelin-qorshaynta sannado dhowr ah,

t) Qiimaha rasmiga (runta) ah ee shaqo-socodsiinta iyo dayactirka (sida qaalibka ah dayactirka dib ayaa la iskaga dhigaa ama waaba la is-illowsiiyaa).

Qorshaynta maal-gelinta: Qorshaynta iyo barnaamajaynta maal-gelinta ee dalal badani inta badan kuma salaysna hormaynta baahiyaha mujtamaca. Magaalo Aasiyada koonfureed ku taalla ayaa dhisatay garoon-kubadeed (stadium) weyn oo cusub ayagoo si ba'an ugu baahan jidad, bullaacado, biyo iyo adeegyada aasaasiga ah ee fududeeya nolosha bulshada. Mar la weydiiyey intee jeer ayaa la isticmaalaa garoonkaa, jawaabtu waxay noqotay saddex ama afar jeer sannadkii. Mashaariicdaa waaweyn ee wax-tarkoodu yar yahay kuma koobna oo keliya gobol gaar ah oo adduunka ah. Waddan kastaaba wuu leeyahay mashaaric noocan oo kale ah. Laakiin nasiib-darro waxa ah in ay khebyraadkii yaraa mashaariicdan oo kale looga leexiyo baahida runta ah ee dadweynaha. Inta aynaan sii gudo-gelin waa in aan si kooban u sharaxnaa waxa ay tahay maal-gelin raasa-maal. Si fudud haddii loo dhigo waxay tahay kharash gelinta kor-u-qaadka nolosha bulshada oo:

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

1. Kharash badan (qaali),
2. Sannad walba aan la qaban,
3. Waqti dheer jiraysa,
4. Noqonaysa hanti-ma-guurto ah,
5. Keenaysa kharash joogta ah oo shaqo-socodsiin iyo dayac-tir ah,

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Qorshaynta maalgelintu waa in ay ka bilaabantaa tiro-koobka iyo qorista hantida ma-guurtada ah ee bulshada iyo qiimeynta xaaladooda. Trio-koobkan waa in ay ku jiraan sifaha hantida, halka ay taalo, inta ay jirtay & xaaladdeeda, kharashka socodsiinteeda iyo dayactirkeeda iyo qiimeynta kharashka iyo mudada dib-u-cusbooneynsiinteeda ama beddelaaddeeda. Tiro koobku waa meel wanaagsan oo laga bilaabi karo habka qorsheynta maalgelinta sababta oo ah waxa ay inaga hor joogsanaysaa in la qoro taxane cusub oo raasa-maal dejin ah. Waana in la hubiyo in loo baahan yahay in dayactir kooban lagu sameeyo ama dib loo cusbooneysiiyo inta aan barnaamij kale la isku qaadin.

Haddii dawladiina hoose ay leedahay shaqaale xirfad leh waa in la faraa in mid kastaa soo diyaariyo wixii wax-ka-qabad u baahan ayagoo wada raacaya nidaam mideysan (standar form) si loo hubiyo in la helo macluumaad iyo xog isku nooc ah oo aasaas u noqota mudnaan-siinta baahiyaha iyo go'aan qaadashadeeda. Mararka qaarkood la taliyayaal muwaadiniinta ah ayaa laga dalbaa in ay soo gudbiyaan mashaariic. Dabcan adiga iyo

xildhibaanada kala ayaa soo jeedin kara mashaariic.

Midkasta oo kuwaa ka mid ah waxa aad u baahan tahay in aad abuurto in inta aad gaadhsiin karo macluumaad u dhigma. Tusaale, dalab kasta oo mashruuc way in ay la socotaa sifaha mashruuca, halka uu ku yaalo, ujeedada iyo sababaha loogu baahan yahay, iyo cida uu wax tari doono. Codsigu waa in uu faahfaahiyaa sida baahiya mashruuuca hadda loo daboolo oo ay wehiliso faahfaahin qiimaha uu ku kacayo oo tifaftiran oo ay ka mid yihiin kharash-socodsiinta iyo dayactirka inta uu mashruuca jirayo. Dalabka mashruucu waa in uu sidoo kale muujiya xidhiidhka uu la leeyahay mashaariicda kale (tusaale, miyuu surto gelinayaa in la helo maalgelin kale oo raasamaal) iyo in uu waafaqsan yahay qorshaha guud ee hore-u-marineed iyo qorsheyaasha kaleba, iyo weliba talooyin loo bixinayo kharashka maalgelinta.

Inkasta oo ay u muuqato in aaney fududeyn ay adagtahay sida lagu heli lahaa xog iyo macluumaad noocan ah, haddana waxay laf-dheber u tahay garaadka aad kaga gaadhi karto go'aan caqligal ah maalgelinta mudada dheer iyo kharashka badan. Tiro yar ayaa dawladaha hoose leh awooda (resources) ay ku fulin karaan dhammaan mashaariicda looga baahan yahay degaamadooda.

Marka aad soo gaadho heerarka u dambeeya ee go'aan qaadashada miisaaniyada raasamaalka, waa in aad is-weydiisaa markale su'aalaha soo socda:

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

1. Ma awoodi karnaa (dhaqaale ahaan) maalgelintan?
2. Ma u adeegi doontaa dadka ugu baahi badan?
3. Ma ka haystaa mashruucani taageero balaadhan bulshada?
4. Waxtarkiisu ma ka badan doonaa kharashkiisii mudo dabadeed?
5. Ma awoodi doonaa in aan ka shaqeysiino, dayac-tirnana marka la dhameeyo dabadeed?
6. Suuragal ma tahay in aan mashruucan ku qancin karo dad kale, sida ganacsatada, in ay u maalgeshadaan si aan ugu qoondeyno kharashkiisii mashaariicda kale ee loo baahan yahay?
7. Ma yahay mashruucani mid macquul ah oo aan daafici karno marka labarbar dhigo baahiyaha kale ee jira?
8. Mashruucani ma kobcin doonaa xaalada dhaqaale ee dawlada hoose iyo shicibkaba?
9. Ma ku haboon yahay muuqaalka guud ee qorshaha hor-u-marint?
10. Ma la socon karaa mashaariicda kale ee maalgelineed ee degaanka laga sameeyey ama laga sameynayo?
11. Haddii aynaan maalgelin oo aynaan hirgelin, cawaaqibka ka dhasha ma xamili karnaa?

Milicsi

Sidee ayuu golihiinu u qaataa go'aamada maalgelinta raasamaalka? Ka fikir laba ama saddex mashruuc oo waaweyn oo ay dawladiina hoose fulisay. Dhan ahaan ma loo baahnaa (tusaale, ma dabooleen baahi rasmi ah oo degaanka ka jirtay) Macquul ma ahaayeen dhaqaale ahaan (tusaale, waxtarkoodu ma ka batay kharashkii galey, ma

Qormo

awoodi kartaan dhaqaale ahaan hadda kol haddii la sameeyey). Dawlada hoose ma leedahay awooda dhaqaale iyo xirfadeed ee ay ku wadi karto mashruucan? Haddii mashaariicdan manta la hor keeni lahaa golihiina codkaaga ma siin lahayd?

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

13

Hawl-galada & Dayac-tirka: Qodobka lale ee aan hore u soo xusnay (la socday maalgeinta raasa-maalka) iyo faro-ku-haynta qalabka & maalgeinta raasa-maalka. Weedhan bal aan si kale u dhigno si aan u garano fikirka Xidhibaannada intooda badan marka la rabo in kharash la geliyo socodsiinta iyo faro-ku-haynta qalabka iyo hantida kaleba. Malaha way yar qallafsan tahaye, faro-ku-hayntu, ama la'aanteedu, waxay ka mid tahay mawduucyada sababa in codku kor loo qaado marka shir la isugu yimaaddo dadka kale (aan ka tirsanayn Dawladda Hoose) ee is-weydiinaya in Dawlada Hoose u maareyn karto hawsha sida gaarka loo leeyahay.

Dhacdooyin wax-ka-soo-qaad leh

1. Dhowr sanno ka hor ayaa hotel weyn oo Africa ku yaalay dab baabiiyay maxaa yeelay waaxda dab demiska ee magaaladu ma haysan wax qalab dab demis ah xitaa hal shay (Qalab) ha noqotee oo laga badbaadin karayay bilicda hoteelkaas. Hal baabuur oo ah kuwa dab demisk ayaa ka dhaqaaqay hoosadiisa laakiin wuxuu ku xumaaday jidkii uu u soo marayay goobta dabka. Qalabka intooda kale waa howl-gab maxaa yeelay waxay waayeen dayactirkii ay u baahnaayeen.
2. Xarun tababarka beeraha ah oo ay maal-gelisay hayad ka mid ah kuwa ugu waa weyn horumarka loogu na tallo galay ganacsiga. Kana koobnayd dhowr dhismo oo belicsan loona qalabeeyay inay qaado 20 farsamoyaqaan iyo shaqaalahoodii kaalin lahaaba. Meesha ay ku taalo waxtar ayay u lahayd howl-socodsiinteeda. Ergo qiimayn ku samaysay mashruucaas oo ka socotay hay'ad kale 12 sanno ka dib markii la furay, ayay u suurto gashay xubin ka mid ah inuu booqdo xaruntaas. Waxa u soo argay agaasimihii iyo shaqaalehiisii oo wale sugaya inay helaan korodhsiimo maaliyad howlfulinta si ay ugu dhaqaaqaan fulinta barnaamijkoodii ugu horeeyay.

3. Joornaal caan ah oo ka soo baxa dal, ayaa qoray sheeko dadweynaha lagu wargelinayo in madax-weynaha koonfur Aasiya lagu sharafay furitaanka farsamo casri ah oo mashruuc biyo gelin lagu sameeyay magaalo ka mid ah kuwa ugu waaweyn oo an aad uga fogeyn caasimada. Isla joornaalkii saddex todobaad ka dib ayaa ku soo qoray boggiisa kowaad sheeko sheegaysa mashruucii inuu xidhnaan doono ilaa laga helayo dalkii ku deeqay maaliyada mashruuca u soo dirayo qalabkii dayactirka iyo khubaradii gacanta ka siin lahayd sida loogu shaqeeyo qalabka mashruuca.

   Inaad horey u maqasheen ayaa dhici karta sheekooyinkan kuwa la mid ah, waxa kaleya oo looga jeedaa inayna bulshooyinkiinu noqon qaar sidaas u nasiib daran.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Fikrado baahsan oo ku saabsan hawl-galka iyo dayac-tirka (S&*D)*

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Socodsiinta iyo dayac-tirka maal-gelinta qalabka iyo kaabayaasha wadamo badan oo aaduunka ah kama ay helin amaan wadaniyinta iyo shisheeya toona. Bal aan jaleecno qodobada ka qayb qaatay raadraaca quusta ee hawl-qabashada dawladaha hoose.

Way adagtahay in loo helo qalab-dayactir mishiinada loo isticmaalo hawl-socodsiinta iyo dayactirka. Wakhtiga ay ku haboon tahay in laga hadlo dhibaatadan waa marka mashruuc la qorsheynayo. Haddii loo arko in ay aayatiinka ay dhibaato ku keeni karto maalgelinta raasamaalka, maalgelinta khatar ayey ku jirtaa. Ha shaqo gelinin waxaanad socodsiin karayn.

Dawladdiina Hoose ma laha xirfad ay kaga shaqeysiiso kuna dayactirto maalgelino cusub.

Qormo

Tani maaha dhibaato aan laga gudbi Karin, waxase ay u baahan tahay in la sii qorsheegyo sidii looga suulin lahaa into dhibaatooyinka ayna dhicin.
Haddii u qalabku yahay mid kaalmo ah waa in la bixiyaa tababar ku filan socodsiinta iyo dayacirka qalabka inta aan lagu marti qaadin wasiirka dawladaha hoose xaflada kala wareejinta. Dhacdo lagu wareejinayay dowlada hoose qalab casri ah oo jidadka lagaga shaqeeyo, oo qiimahiisa ahaa dhowr millian oo doolar. Kaasi wuxu ahaa warka intiisa fiican. Intiisa xun na?

Deeq-bixiyuhu wuxu bixiyay tababar saddex maalmood ah oo koobaya socodsiinta iyo habka dayactirka qalabka. Tababarka intiisa badan ku baxay cashir "tiyoore" ah oo aan ahayn sida ugu fiican ee lagu barto farsamo gacmeed.

Xildhibaannadu way ka cago-jiidaan inay u qoondeeyaan kharashka looga baahan yahay socodsiinta iyo dayactirka (S&D), taasoo keentay in dawlada hoose oo badanaa ay ka baaqsadeen inay qabtaan howshan muhiimka. Kuwa ka aamin baxay dawlada hoose waxay yidhaahdaan sababta loo maalgelin waayay S&D waxa weeye iyadoon lahayn wax la is-dhaaf-dhaafiyo/la musuqmaasaqo. Ma qabn fikradan, waxaanan rajeynaynaa inaanad adna aaminsanayn caqliyadaas. Waxaan ku qanacsanahay in xildhibaanada badan koodu aanay fahamsanayn kana baaraan-degin khasaaraha lexaadka leh ee ay keeni karto haddii aan si ku filan loo maalgelin S&D. Dayactir wax ku ool ahi waxa uu noqon karaa maalgelinta ugu kharashka yar ee ay dawlada hoose ugu adeegto bulshada. Dayactir la'aan waxay ku gelin kartaa kharash badan.

Milicsi

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Kol haddii S&D ay muhiim u tahay is-maamulka toosan, waxaanu kuu soo jeedinaynaa inaad muddo yar ka baaraan degto siyaasada maamulkiina ka leeyahay arrinkaas. Maxay yihiin dayactirka idiinku dhibaatada badan? Jidadka? Mishiinada iyo qalabka (biyaha iyo bulaacadaha)? Gaadiidka? Dhismayaasha dawlada? Waa maxay cawaaqibka ka dhalan kara duruufahaas? Haddii hawl qabadka S&D oo heerkiisu liito, maxaad ka qaban kartaa?

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Siyaasadaha Maaliyadda

Golahiinu ma dejiyay Siyaasad go'aan qaadashada maaliyada iyo mid jihaysa kuwa mas'uulka ka ah maareynta maaliyada? Waxaan filaynaa inaad leedihiin laakiin ay ku kala filiqsan yihiin dukumenti badan, ama ay adkaanayso in si xidhiidhsan loogu dhaqmo haddii laba bedelo kuwa ay khusayso, oo aanay habeysnayn raad raacna loo helayn. (arag buuka xildhibaanka kaalintiisa siyaasad-dejiyaha), siyaasadaha maaliyada inta badan waxay isku milmaan/dhex-galaan codsiyada deeqaha, heshiisyada deynta, qorshayaasha guud, iyo fulinta maamulka, laakiin looma qeexin si qof walba uu garan karo halkay dawlada hoose ka taagan tahay wajiyada kala duwan ee maareynta maamulka iyo xadka misaaniyada ummadda.

Fa'iidooyinka dhabta ah ee diyaarinta siyaasada maaliyadeed:

b) Waxa ay kordhinayaan aaminaada iyo kalsoonida dadweynuhu uu ku qabo dawlada hoose;

t) Waxa ay ka bixinayaan sawir weyn halka maamulkiinu ka taagan yahay arrimaha miisaaniyada

j) Waxay kordhinaysa deganaanshaha miisaaniyada dawlada. Waxa ayna keentaa hanaan joogta ah oo loo raaco qorsheynta mashaariicada waaweyn, maalgelinta hantida (raasamaalka) iyo adeegyada.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tallaabada ugu horeysa ee loo qaadayo dhinaca siyaasad dhamaystiran oo maaliyadeed waxa weeye inaad isku keento wixii dukumenti ah ee hadda jira lana xiriira habka maaliyada ee dawladiina hoose. Waxa aad la shaqeysaa madax waaxeeyada iyo madaxda kale si aad uga hesho wixii looga baahan yahay iyo aragtidoodaba. Ka hube wasaarada dawlada hoose in ay jiraan magaalooyin kale oo ku dhaqmay habkaas, codsiga noocan aha waxa uu kuu horseedi karaa in ay kaalmo farsamo ka heshid wasaarada, iyaga oo la fajacsan in dawlada hoose run ahaan isku daydo inaad nidaamkan horsed ka noqoto. Waxa kale oo jeedisaa tallo bixinta dadweynaha marka aad soo saarto nuqulka hore. U qaybi xeel-dheerayaasha si aad uga hesho jawaab-celin iyo tallooyin. Ugu dambayn, ku dhaqan oo hirgeli dabadeedna gaadhsii maamulada magaalooyinka kale ee dalka si ay uga faa'iidaystaan nidaamkan aad horseeday.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Siyaasado maxay ah?

Asal ahaan waxa jira todoba madax miisaaniyadeed oo siyaasada kaa caawin karaan inaad midayso macaamilkaaga maaliyadeed. Isla markaana aad hoose u dhigto walaaca xaalada maaliyadeed ee mustaqbalka. Madaxyadaasina waa:

- ∉ Miisaaniyada hawlfulinta
- ∉ Maalgelinta raasamaalka/horumarinta maaliyada
- ∉ Deynta
- ∉ Dakhliga
- ∉ Keydka
- ∉ (hab-dhaqanka) maalgelinta
- ∉ Xisaabaadka, hanti-dhawrka iyo war bixinta maaliyada

Waxa soo socda tusaalayaasha miisaaniyada labo madax miisaaniyadeed oo ka mid noqon kara siyaasada miisaaniyada, (tusaale hor-u-marinta raasamaalka siyaadaha miisaaniyada iyo siyaasadaha dakhliga). Kuwa buugan qoray waxa laga soo minguuriyay “handbook on financial performance goals” oo ay daabacday “International city Management association” sannadkii 1980kii oo qayb ka ahna mashruuc weyn oo looga danlahaa in lagu caawiyo madaxda dawladaha hoose in ay bartaan sida ay u qiimayn lahaayeen xaalada maaliyadeed ee hayadahooga dawliga ah.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Xaaladdiina Maaliyadeed waa sidee?

Marka si guud loo qeexo xaaladiina maaliyadeed waa awooda dawlada hoose isku bixin karto si joogto ah. Si gaar ah haddii loo eego waa awoodiina aad:

b) Ku sii wadi kartaan adeega;
t) Ugu samota-baxdaan khalkhalka dhaqaale
j) U dabooshaan baahiyaha dhaqaalaha koraya/dhacaya ama isbedelaya.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Sida ay dhigayso warbixinta “International City Management Association”, waxa jira dhowrqodob oo ah xaalada maaliyada oo u baahan inaad la socoto si aad ugu guuleysato inay fayoobaato miisaniyadaada dawlada hoose. Waxa ay nu doonaynaa in si qoto dheer aynu u eegno qaar ka mid ah qodobadan si ay kaaga caawiyaan in aad la socto xaalada maaliyadeed ee dawlada hoose.

Aan ku bilowno dhibaatooyinka ka iman kara dakhliga.

Tilmaamayaal dakhli

1. Gun-dhega dakhligiinu miyuu ka sii darayaa? Dakhliga madaxiiba miyuu sii yaranayay sannadadan.

2. Miyaad leedihiin nidaam hoosaad ama siyaasada sharciyeed, oo si daran u saameeyay wax soo saarka dakhligaaga? (Tusaale miyaad leedihiin siyaasada aan qornayn si aan caqli-gal aheyn cashuur dhaaf u siinaya tijaarta iyo dadka qalqaalada badan leh iyo kuwa magacaba leh? Miyuu u qoonday-sanyahay dakhligiina boqolkiiba xadi kordhaya in lagu isticmaalo wax yaabo gaar ah?)

3. Dawladiina hoose miyay si weyn ugu tiirsan tahay ilo dakhli oo dibedeed (tusaale deeq aad ka heshaan dawlada dhexe ama deeq-bixiyayaal kale?)

4. Haddii aad cashuurtaan hantidi-ma-guurtada ah miyaad dareenteen hoos u dhac? Miyaad dib u deristeen si aad u waafa-jisaan qiimaha suuqa ee hadda?

5. Cadadka cashuurta aan la bixinin si xad-dhaaf ah miyuu u badan yahay mise kordhayaa?)

6. Dawladiinu miyay leedahay meel keliya (hal khayraad) ah oo dakhligu ku tiirsan yahay, sida amaahaha, xisaab-wareega gudaha dawladda, ama la isticmaalo keyd-yo?

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

7. Cashuurtii dadka loo adeego laga qaaday miyay hoos u dhacday marka loo eego kharashyadoodii (tusaale- dakhliyadii cashuurta laga soo ururinayay suuqa oo hoos u dhacay halka qiimahoodii hawl socodsiintoodii iyo faro ku-hayntoodii ay korodhay?)

8. Dawladiina hoose miyey waafajisaa fiida (fee) iyo ujuurada adeegyada xaaladaha sicir-bararka iyo korodhka kharashka hawl fulinta.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

9. Miyaa ay qaab-dhismeedka dadweynaha (demography) iyo dhaqaaluhu si daran u saameynayaan sida aad ku heli lahaydeen dakhli mustaqbalka dhaw (tusaale, saamiga dadka da'da waaweyn oo kordha, shaqooyinka warshadaha oo la waayo)?

10. Ma aragteen hoos-u-dhac dakhli oo muujinaya xaalad maaliyadeed oo sii xumaaneysa?

Tilmaamayaasha kharash-galka

Maaliyada qaybteeda kale ee muhiimka ahi waxay tahay kharashka oo kaaga baahan inaad siiso fiiro gaar ah haddii aad tahay xildhibaan. Way cadahay, dawoladiina hoose inayna galayn xadi-korodh kharash ka siyaado ah sareeya xadi-korodhka dakhliga. Maadaama, kharashyadu ay si fudud ku galaan hay'aduhu, ka taxadarkiina waa muhiim . Wax yaalaha aad ka foojignaaneyso waxa ka mid ah:-

1. Miyaa ay idin soo martay kharash korodh qofkiiba oo ka badan dakhli korodhka qofkiiba? Hadii ay jirto (sidaa si) ma sugi kartaa kharashka ku kordhay) Ma mashaariic iyo adeegyo cusub baa? Kuwii hore ama kuwa cusub? Waax gaar ah? Maalgelin raasamaal mise hawl-socodsiin? Saameyn guud oo kharash sida mushaharooyinka? Haddaan soo koobno , gaar u timaan halka kharashku ka kordhay.

2. Miyaa aad aragteen tirada shaqaalaha oo kordha marka madaxa loo eego?

3. Miyay hoos u dhacaysaa wax soo saarka shaqaaluhu.

4. Miyay foojarka mushaarka kuugu jiraan "magacyada shaqaale aan jirin" (caaglayaal)? (kuwiina aan ogayn inay jirto farsamadan khiyaamada ah, dawladaha hoose qaarkood ayay ugu jiraan foojaradooda mushaarka tiro shaqaale ah oo aan goobaha shaqada lagu arag. Taasoo aan ku eegayn waax, shaqaale dhintay dhawr sanno ka hor welina qaata mushaarkoodii (jeega-mushaarka); hadaba, waad garatay inay arrintu cadahay. Magaalo Afrika ku taal ayaa laga eryay shaqaale kor u dhaafay 1200 oo ka trisanaa cududooda shaqaale oo dhanaa 3000, taasoo ahayd shaqo wanaagsan oo xididada loogu saarayey shaqaalaha caaglayaasha ah.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

5. Miyay kharashyada xadidan, ama "khasabka ah" la kordhaan sida ay u kordhayso boqolkiiba wadarta kharashka hawl fulinta (tusaale – bixinta deynta, xuquuqda hawl gabka, heshiisyada muddada dheer ah?)

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

6. Miyaa kharashka xuquuqaha dheeraadka ah kordhiyaa marka loo eego boqolkiiba mushaarooyinka? Nidaamyada qaarkood ayaa u ogolaada shaqaalaha in ay is gaadhsiiyaan fasaxyo aanay qaadan sannado badan oo culeys ku noqda xildhinaanada marka dambe.

7. Miyaa aad leedihiin hab aan wax-ku-ool ahayn oo lagu daba gelo miisaaniyada oo ogolaada in uu kharashku kordho ayada oo cid na ka war qabin ama ogolaada kharash-dhaaf aan la xadidin meelaha qaarkood?

8. Miyaa ay dawladiina hoose iska dhego-marinaysa mas'uuliyadeeda dayactirka ah? Haddii ay sidaa tahay, tan waxa ay cawaaqib xun ku keeni doontaa mustaqbalka qiimaha iyo tayadaba.

Tilmaamayaal kale oo dhiillo-sheeg ah

1. Miyaa aad ku salayseen xaalada lagu jiro dheeli-tirka miisaaniyadiina?

2. Miyaa aad joogtaysaan keydadka loogu talo galay arrimaha deg-deg ah?

3. Miyaa ay, leedahay kharash (lacag ahaan) soo gala oo ku filan in wakhtigooda lagu bixiyo qaan-sheekatooyinka dawladiina hoose?

4. Haddiii dawladiina hoose ay samaysato wakaalado u fidiya adeegyada qaarkood (sida biyaha iyo bulaacadaha) miyay lacag yar ku fuliyaan? xasuuso, qaar badan oo ka mid ah hawl fulinadaas inay leeyihiin maareyn xumo soo noqnoqota.

Maxaayeelay iyakoon si toos ah u hoos imanayn dabagalka golaha xildhibaandiina, taasoo micnaheedu aheyn, wixii ay xumeeyani inayna wax u dhimi karaynin magaca ama sameecada dawlada hoose.

Ma dhaqaale-darro ayaa idin ku soo fool leh?

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Dhibaatooyin badan oo ka mid ah kuwa horey aanu u soo qaadaadhignay waxay khatar (mijaxaabin) gelin karaan maaliyada dawladiina hoose haddii muddo dheer la dayaco. Marka tani dhacdo, oo keenaysa in la go'aansado xalintoodii habab guracan oo aanan xalinayn dhibaatadii, lakiin ay kaga sii daraanayso dhibaatadu kuwa xildhibaanada ah ee raacaya talaabooyinkaaga. Hadaba, si kooban aanu u eegno talaabooyinka qaarkood oo ay qaadi karto dawladiina hoose marka xaaladahaas oo kale soo wajahaan:

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

1. Miyaad wadaan isticmaalka keydadkii soo tarmaayay sannadihii la soo dhaafay oo aad ku dheeli tirtaan miisaaniyada? (waa la garan karaa, qaar idinka mid ahi inay yidhaahdaan "Anagu aad baan u nasiib badanahay").

2. Miyay soo wajahdaa golahiina xildhibaanada xaalad joogta ah oo soo deynsado lacag uu ku daboolo kharashyada ama uu ku dhaqmo farsamayn ah inuu lacag laga saaro lamber xisaabsocota kuna shubo ku kale si loogu dabool qaan-sheegatooyinka taagan.

3. Miyaad si isdabajoog ah u daahisaan bixinta kharashyada dayactirka iyo waliba kuwa muddada dheer socda ee ay ka mid tahay hantida hawl-qabadka?

4. Miyaad iibisaan hantida ma guuraanka ah ee dadweynaha si loogu daboolo kharashyada la galo?

Ugu dambeyn had iyo jeer waa suurtogal in lala kulmo xisaabiye xariif ah oo isku dubaridi kara "buugaanta" si uu uga dhego miisaaniyada mid isku-dheeli tiran. Qaabkan

siyaabo badan ayaa loo qaban karaa, iyadoo ay ka mid noqonayso dhaq-dhaqaajin qorshaysan oo dib loogu dhigayo miisaaniyada mustaq-balka. Waajibaadyadii hadda la qaban lahaa iyo kordhkii dakhliga sannadka soo socda oo lagu darsado sannadkan. Si nasiib daro, qaroomooyinkani/xeeladahani waxba kama tarayaan xalinta dhibaatooyinkan.

Sidaan bilawgiiba u sheegnay aqoonta la xiriirta qaybtan ama dhamaystirka xilkan, waa mid adag, oo qaalina ah. Sidan marka loo yidhaahdo, waxa la odhan karaa waan ka leexanay wadadii aad u malaynayseen inaan idiinku ridayno. Haddii aad noo ogolaataan inay noqoto inaanu is difaacno, waxaanu rumasanahay inay muhiimad idiin leedahay idinka iyo saaxiiibadiina xildhibaanada inaad fahamtaan "sawirka weyn" ee muuqanaya marka ay timaado hawlaha maaliyada.

Tusayaal Ah Akhrinta Bayaanada Maaliyada

Inta aynu xidhin ka hadalkan ku saabsan xilkiina maal-gelineed, waxaan doonaynaa inaan ka bixino faalllooyin dhowr ah oo sida loo akhrinayo bayaanada maalgelinta. Sannado lala shaqeynaayay xildhibaano la soo doortay, waxa la ogaaday inay qaar badan oo idinka mid ahi ay leeyihiin iino guracan oo aan la xagameyn kareyn makra gacmahooda ay soo galaan bayaano ay ka buuxaan tirooyin. Waan u dabacsanaan karnaa maxaa yeelay cabsi ayaa naga ka jirta arrimahan. Halkan waxa aanu ku qoraynaa raadad ka mid ah sida loo dhimo/yareeyo walwalka kaaga iman kar marka lagu hor keeno bayaanada maaliyada ee billaha ama afar bilood laha ah si ay u noqdaan qodobada fadhiga soo socoda ee golaha xildhibaanada. Bilowga ku koobnow dhawr ka ugu mudan tilmaamayasha waa-weyn ee maaliyada fayow ee maamulkiina hoose. Miyaa ay guud ahaan dakhliyadu ku filan yihiin qiyaasihii la sameeyay wakhtigii miisaaniyada la dejiyay? Si loo fahmo sawirka qaybtiisan, waxa aad u baahan doontaan inaad ku samaysaan qiyaaso xiliyaysan sida dakhligu ugu soo xiroonayo dawladiina hoose. Maxaa wacay? Maxaa yeelay meelaha dadkhligu ka soo baxo qaarkood ayaa laga soo ururiya lagaco kala badan marka lagu guda jiro xiliga miisaaniyad dejinta. Tusaale – waxa la helayaa dhammaadka afar bilood lahaa labaad oo 50% ka ah, wadarta guud ee dakhli sannadeedka la qiyaasay waa ay ina marin habaabinaysaa haddii la yidhaahdo goob weyn waa in tirada isugenta dakhligeeda lagu soo ururiyaa lixda bilood ee sannadka ugu horaya gudahooda.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Si la mid ah ayay saameyn ugu yeelanaysa raadadka kharashyada. Miyaa lagu xakameeyay inta ay u ogol yihiin xuduudaha uu u sameeyay isugeynta guud ee miisaaniyada sannadeedka, miyaa ay waafaqsan yihiin qiyaasaha billaha ah ee ay sameeyaan shaqaalihiina? Maya haddii ay tahay, waxay tahay xilgii wax la iska weydiin lahaa su'aalaha la tilmaamay inaan u magacowno xubno gaar ah oo ka tirsan shaqaalaha oo iyaga lagala xisaabtamo maareynta maaliyadaha maamulkiina.

Fiire goobaha dakhliga. Qaar aad uu yare miyay ku jiraan, oo inagu keenaya kharash dheeraad ah dakhli ka soo ururintooda oo ka badan kan laga soo ururiyo. Tani maahin waayo aragnimo aan caadi ahayn. Haddii ay idiin soo wajahdo qaar noocanoo kale ah oo aan lahayn wax soo saar waxtar ah, goobahaas ama waa la xidhayaa ama waxa kor loo

qaadayaa awoodooda haddiii ay suurto gal tahay.

Mid la mid ahi waxay dhab u saamaysaa kharashyada. Miyaad leedihiin kharashyo loo arago inay si aan caadi ahayn uga sareeya marka loo eego kuwa kale iyakoon la heyn sabab macquul ah/cad? Haa haddii ay tahay, waa wakhtigii kuwa ka masuulka ah laga codsan lahaa inay sharaxaad ka bixiyaan.

Ku dhaqan xeerka nin ka la yidhaahdo berito. Si sahlan ayuu u dhigay, wuxuuna yidhi, guud ahaan dakhliga (ama kharashyada) 80% waxay ka soo xiroodaan 20% goobaha (qaybaha) cashuurta. Xaaladu wajigan yeelanaysaa, haddaba, badanaa waxa aad u waxtar badan, waxa ku oolna ah in diirada la saaro 20% ka dakhliga ka soo hoyanaya qoobaha, ee noqonaya 80% miisaaniyadaada, haddii aad doonaysaan ururisaan dakhli badan, ama aad joojinaysaan 20% ka qaybaha ee ay kaaga baxayso kharashka 80% miisaaniyadaada.

Tilmaamaha kale ee maaliyadeed ee ah in dib loo eego waa sida lacagtu u soo gasho/xerooto. Miyay ku filan tahay lacagta soo xeroonaysa inay daboosho kharashyada joogtada ah. Haa haddii ay tahay maxaad ka qaban kartaan? Ma awoodi kartaan inaad hoos u dhigtaan kharashyada iyadoo aad dib u dhigaysaan kharashyada qaarkood ama aad dardar gelinaysaan goobaha dakhliga ee ay ka suuroobayso in loo maareeyo sidii dan la moodo? Tusaale – ma la ururin karaa cashuurta laysamada ganacsiga sannadka bilahiisa ugu horeeya?

Soo xereynta cashuurto (lacg ahaan) muhiimada ayey u leedahay cudud melayeedka xiliyeedka ama dheereyada socda. Haddii dawladiina hoose ay soo saaray oo cashuur dheeraad (saa'id) ah, miyaad gelinaysaan goobo la isla ogolaaday?

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Marka aad fiirisaan tilmaamayaasha leh "tigidhada waa-weyn" ka dib, waxay thaya liistaanka/diirada in la saaro qaar ka mid ah goobaha dakhligoodu cad-yahay oo afgarad maaliyadeed leh. Miyay jiraan dakhliyo ama kharasho leh baalal balaadhan oo aad ku soo waay-aragteen oo, ay leeyihiin qaybo gaar ahi. Tusaale – miyay leeyihiin inay si xoog leh hoos ugu dhacaan dakhliga cashuuraha suuqa (saylada) laga dhaafay – bishii ama afar bilood lihii la soo dhaafay. Haa haddii ay tahay, una muuqato inayna lahayn sabab la rumaysan karo raadi waxay u dhacday? mid la mid ahi, waxay dhab uga jirtaa kharashyada. Tusaale – miyuu qiimaha shidaalku korodh aan la filanayn ma ku dhacay bilahii ugu dambeeyay? Haa haddii ay tahay raadi waxay u dhacday?

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Waxa laga yaabaa in aad doonaysaan inaad raadisaan bayaanada maaliyada goobo dakhli iyo qaybo kharashyo oo ka maqan. Tusaale – haddii ayna jirin lacago loo qoondeeyay dayactirka jidadka iyo bulaacadaha, waxa aad dooni kartaan inaad heshaan sababta keentay. Arrintan wakhtiga miisaaniyad dejinta in wax laga ka qabto ayey ugu wanaagsan tahay, laakiin su'aalahan oo kale way ku haboon yihiin wax ka qabadkooda wakhti kastoo sannadka gudahiis ah inta aad huwan tihiin xilka maalgeliyanimada.

Tilmaamayaal Muhiim ah

- Maalgelie dawladeed noqoshadiisu way balaadhan tahay adagtahayna, baahanaan leh, ay tahayna shoqo muhiim ah.

- Hab madaxeedka loo dejiyo miisaaniyada, intooda badani ay isticmaalaan dawladaha hoos e wuxu hubaal kaaga dhegaya inay leeyihiin hab xisaabeed caqli gal ah iyo maareyn xumo.

- Dariiqa wanaagsan oo loo dejiyo miisaaniyada raadinteed wali may noqon mid aad waxtar u leh. Waxa jira in yar oo rajo ah oo laga helay wareegii ugu dambeyay ee dejinta miisaaniyada – oo ah wax loogu yeedho hadaf laga soo dheegtay miisaaniyad dejinteed (mission-driven budgeting).

- Xildhibaanka, haya xilka maalgeliyaha, wuxuu u baahan yahay xog maaliyadeed oo isku dhafan si loo heli karo xogta iyo tirooyinka dhammaan looga baahan yahay heerarka kala duwan ee kala ah – siyaasad sameynta, hawl fulinta, daba-gelka & qiimeynta.

- Qorshaynta maalgelinta raasamaalka iyo dayactirka qalabka iyo dhismayaasha waxay noqdaan labada hawlood ee xiliyadoodu ugu mugdisan yihiin cimriga dawladaha hoose badan-lood. Waxay u baahan yihiin in la siiyo fiiro gaar ah si ay xildhibaanadu u qabtaan xilka maalgeliya.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

- Xildhibaanada dawlada hoose qadariyaan ku dhaqmaadka siyaasadaha maaliyada inay hagto wax qabadyada ula kaca ah & dejinta qiyaaso iyo shuruucda hagaysa fulinada labadaba una baahan yihiin madaxdoodu.

- Xaalada maaliyadeed ee dawladiina hoose waxay ku xidhan tahay qodobo badan iyo tixgelinta la siiyo dakhleyada iyo kharashyada u baahan in aad siisid mudnaasha ugu sareeya.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

- Waxa jira tiro khatar ah oo meelo-gaab-gaaban ka soo baxa oo mustaqbalkiina maaliyadeed ka dhigi kara meel ay ku meja-xaabin karaan. Halkana looguma tallo galin in mid ka mid ah lagu taliyo –bixiyo.

Raad-raac

1. Bilowgii dadkii dib u eegay agabkan ayaa qaarkood dareen ka qabeen isticmaalida ereyga "xooleeye". Ereygan dhadhankiisa oo u janjeedha ganacsiga, si fiican uma cabirayo aragtida guud ee doorka xildhibaanka degaan. Laakiin markii aan falanqaynay erayo kale, way noo suurtoobi wayday in aan helo erey kale oo u cuntama. Tusaale, 'miisaaniyad-sameeye' (budgeteer) aad a yuu u kooban yahay; 'maareeye maaliyadeed' (financial manager) waxa uu sharaxayaa xilalka khasnajiga; 'qorsheeye khayraad' (resource planner) aad ayuu u balaadhan yahay; kuwa kale ee aanu eegnay na waa ay gudbin waayeen nuxurka muhiimka ah ee doorkan. Halgaa kan magic-bixineed ka dib waxa aanu dib u qaadanay ereyga 'xooleeye'. Doorashadan waxa taageeray qaamuuska '*Webster*' oo qorey in isticmaalka ereyga 'xooleeye' uu jirey ilaa sannadkii 1618 oo uu macnihiisu yahay " ka ku takhasusay in uu abuuro (ururiyo) oo uu kharash gareeyo hantida guud".

2. Valente, Maureen, "Budgeting," ch. 6, *Elected Officails handbook, Setting Policies for Internal Management* (3rd ed.), No. 4 (Washinton, D. C., International City Management Association, 1988) p. 42.

3. Anton, Thomas J., *The Politics of State Expenditure in Illinois* (Urbana, IL, University of Illinois Press, 1966), pp. 49-52.

4. This approach to public budgeting is described in detail in Osborne, David and Gaebler, Ted, *Reinventing Government: How the Enterpreneurial Spirits is Transforming the Public Sector* (Reading, MA, Addison-Wesley, 1992), pp. 3-4

5. Godsey, Maureen W., *Financial Performance Goals: A guide for Setting Long-range Policies, Handbook No. 4*
(Washington, D.C., International City Management Association, 1980), p. 5.

6. Groves, Sanford M., *Evaluating Financial Coditions: An Executive Overview for Local Government Handbook No. 1* (Washinton, D.C., International City Management Association, 1980), pp. 11-19.

8. Godsey, Maureen W., *Financial Jeopardy!: Policies andPractices That Can Affect Financial Health, Handbook No. 3* (Washinton, D.C., International City Management Association, 1980), pp. 5-10.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

25

Qaybta 2aad

Aqoon-is-weydaasri

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

26

Aqoon-is-weydaarsi

Guud Mar

Ujeedo

Kulan hawleedkan waxa uu barayaa ka qayb galayaasha xilka xildhibaanada ay ku leeyihiin habka xooleeye ee dawladaha hoose iyadoo xoojin gaar ah la saarayo qorshayn maaliyadeedka miisaaniyad sameyeynta ee mudada dheer. Xildhibaanada dhamaysta kulan hawleedkan waxay awoodaan inay cadeeyaan tillmaamayaasha dakhli iyo kharashka u caanka ah qaarkood iyo sida loogu isticmaalayo qiimeynta xaalada maaliyadeed ee ka jirta dawladaha ay u shaqeeyaan u adeegaan.

Tusmada

Sharax gaaban oo laga bixinayo hawl barasho kasta waxay ku muujisan tahay yihiin hoos iyadoo ay raacsan tahay dhererka wakhtiga ay u baahantahay qiyaas ahaan. Haddii aad doonto inaad wax ka bedeshaan taxanahooda, si wax looga saaro ama lagu kordhiyo aqab wax barasho oo ah wax aad leedihiin, ku dhaqaaq fulinteeda xorbaad u tahinnee.

8.1

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Layli xiiso/Dardar gelin ah: fikir is waydaarsi ah: Ka soo qayb galayaasha waxay qorayaan fikrado hal abuur leh oo kor loogu qaado ururinta iyo keydinta lacagta magaalooyinkooda. War bixintooda waxay ku soo bandhigayaan warqado baladhan si looga dodo (30-45 d).

8.2

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

wadaagid (isdhaafsi) waayo aragnimo: Kuma ayaa qabtay wax? Ka qayb galayaashu waxay isticmaalayaan qoraalo la siiyay si ay u tilmaamaan masuuliintooda maamuladooda kuwa ka mas'uulka ah 20 ila 24 qorsha maaliyadeed iyo shaqo maareyneed mid kasta (75 daqiiqo).

8.3

Cashar bixinta tababaraha: cashir bixin kooban oo ku saabsan xildhibaanka ah maalgeliyaha, laga soo dheegay cashirka buugan ee ku saabsan tababarida iyo waayo aragnimadiina iyadoo dib loogu eegayo habka miisaaniyad sannadeedka, ka fiirsashadu muhiimada ay u leedahay "Qorshaha xiliga dheer" ee maalgelinaha iyo kaabayaasha maalgelinta. In laga dodo miisaaniyada siyaasadeed maaliyadeed iyo sida xildhibaanadu

Aqoon-is-weydaarsi

naf-ahaantood ay isku gu diyaarin lahaayeen inay qaadaan daba galka maaliyadeed ee bulshooyinkooda (30 daqiiqo).

8.4

Xaalad Barasho: Darsid cashuur siyaasadeed aan ula kac ahayn. Ka qayb galayaashu waxay akhreyayaan xaalada arin khusaysa qiimayaasha allaab isku-dubaridoodu aysan is-qaadanaynin oo ah hadafyo cashuureed si looga dodo cawaaqibahaka iman karo laakiin siyaasad maaliyadeed aan la qeexin ku dhaqida fayo-qabka maaliyadeed ee bulshada (90 daqiiqo).

8.5

Layli: Qiimaynta xaalada maaliyadeed. Ka qayb galayaashu waxay isticmaalayaan liisto ah dhibaatooyin maaliyadeed oo caan ka ah maamulka dawladaha hoose, si ay u qiimeyn ugu sameeyaan xaalada maamulada dawladahooda hoose iyadoo qiyaaso laga dhegana xaalad deg-deg ah, muhiimad ay leeyihiin iyo in laga dodo waxa laga yeelayo xalinta dhibaatooyinka la cadeeyay (90-120 daqiiqo).

8.6

Layli: ka baaraan dega bayaanada maaliyadeed. Ka qayb galayaashu waxay isticmaalayaan bayaano maaliyadeed oo tusaale ah ayey codeynayaan isburimaha/isqaban la'aanta ku jira qaababaka dakhliga iyo kharashka, si ay u maleeyaan dhibaatada keeni karta isburimahan (60-75 daqiiqo).

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

8.7

Layli xirfad gudbin ah. Weydii xildhibaanada, inay gaar gaar u soo gudbiyaan/u sheegaan waxa ay ka damacsanyihiin inay qabtaan kulanka ka dib iyo waxa ay ku qabanyaan waxa ay ka barteen ee ah qorshaynta maaliyadeed iyo maareynta kulankan, si ay ka dib kuwa kale ula wadaagaan (30-45 daqiiqo).

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

8.1 Layli xiiso gelin ah: Ra’yi is-weydaarsi

Wakhtiga: 30-45 Daqiiqo

Ujeedo

Layligan ka qaybgalyaasha waxa uu ka caawinayaa abuurida afkaaraha (afkaarta) dakhliga kor loogu qaadayo iyo kharashyada hoos u dhegoodaba iyo inuu ka qayb galayaasha ku dhiirigeliyo wada hadalo dhexdooda ah.

Geedi-socod

U sharax ka qaybgalayaasha inay waayo aragnimadooda xildhibaan ka soo dheeganayaan si ay u abuuraan afkaar badan intay karaan oo saray loogu qaadayo dakhliga adeegyada dawladaha hoose iyo hoos u dhegida qiimayaasha adeegyada lagu fulinayo loona isticmaalayo dariiqada afkaar abuurista loo yaqaan xeelad koox magaceed (the nominal group technique NGT).

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Ku bilow, oo lagu qoray warqad balaadhan laba su’aalood oo bayaan ugu muuqata dhammaan ka qaybgalayaasha:

1. Maxay tahay hal talaabo oo ay dawladeyda hoose ku dhaqaaqi karto si ay u soo ururiso dakhli badan?
2. Maxay tahay hal talaabo oo ay dawladayda hoose ku dhaqaaqi karto si ay u dhinto qiimaha?

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Ka qaybgalayaasha ayaa la weydiinaya si ay uga jawaabaan su’aalaha iyakoo u qoraya sida fikradooda la tahay; hadana waxa la weydiisanayaa inay soo jeediyaan warbixintooda. Ku tax afkaartada dakhli kordhinta ah dhinac warqada ballaadhan, dhinaca kalena kuwa dhimida qiimaha.

Marka la dhammays tiro labadan taxniin, ku bilow dood aad ka qaybgalayaasha ku weydiinayso dhawrkan su’aalood:

1. Kumaa manta korodhsaday ha ugu yaraatee hal fikrad oo waxtar leh?
2. Miyay jirtaa fikrad cid kale oo dhaqaajisay fikrad ay xidhiidh leeyihiin oo ku jirtay maskaxdiina?
3. Waa maxay saameynaha uu layligani ku yeelan karo idinka iyo xubnaha xildhibaanadiina?

Aqoon-is-weydaarsi

Qoraalada Xeelada koox Magaceedka

Xeelada koox magaceedku waxay thaay tab ah fikrad wadaag oo loo isticmaalayo abuuritaanka fikrad, codeyn habaysan iyo dood kooxeed waxay caawiyaan sida-kooxe u dooran lahayd xalka ama hawl qabadka la doorbiday. Habku waxa bayaan kooban oo dhibaatada lagu xalinayo ku qoro warqad balaadhan (chart pad) (bayaan ku bilaabmaya kelmadaha, "Sidee baa…..") ha badnaato ama ha yaraatee u xidhiidhsan sida soo socota.

Tallaabada 1:

Bayaanka dhibaatada marka la akhriyo ka dib, horjoogahu ka qaybagalayaasha waxa u weydiinayaa inay qoraan fikrado badan inta ay heli karaan xalal suurto-gal u noqon kara dhibaatada. Waxa la weydiisanayaa ka qaybgalayaasha inay u shaqeeyaan aamusnaan kele-kele ah.

Tallaabada 2:

Iyadoo loo fadhiyo qaab wareeg ah, ayaa la weydiisanayaa ka qaybgalayaasha inay soo jeediyaan jawaabaha ay soo taxeen, isakoo horjooguhu u qorayo sida ay ugu qoran yihiin warqada balaadhan.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tallaabada 3:

Marka ay dhamaadaan fikradihii la soo jeedinayay ka qaybgalayaasha waxa laga codsanayaa inay fikradahaas mid mid uga doodaan si loo hubiyo in la fahmo mid kasta. Talaabadani waxay xoog saaraysaa in la cadeeyo micnaha aysan aheyna in laga dodo suurto-gal ahaansho-nimadeeda.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Tallaabada 4:

Ka qaybgalayaasha ayaa laga codsanayaa inay keli keli uga doortaan fikradaha warqada balaadhan ku qoran shanta ay u argaan inay ugu wanagsan yihiin, mid kastana gaar ugu qoraya kaadh. Ka dibna, horjoogaha ayaa eegaya sida codkoodu isku ku xidhmayo, natiijadana sheegaya (fikrada noqotay/gashay kaalinta kowaad). Fikrad-abuurista lagama yaabo inay u qabsoonto si ka qaybgalayaashu u wada yeeshaan xidhiidh fur-furay dhexdooda bilowga, xkm waxay ka qaybgalayaashu u ogolaata inay wada shaqeeyaan marka ay ku jiraan/shaqeynayaa hab qaabaysan. Ama nidaamaysan, laakiin waa inay u qoraan afkaartooda si xor ah. Natiijo ahaan, kooxaha XKM waxa la ogaaday inay ku hawlqabad badan tahay iskhexgalida kooxaha , marka la eego tayada afkaaraha la soo saaray. Maxaa yeelay inay tani u muuqanayso kooxaha kaqayb-galayaasha ee XKM ay yartahay siday dhibaato ugu noqon lahayd ka qaybgalayaasha ka joojiso la hadalka midba midka kale iyo siday u nuqulayn lahaayeen in la soo saaro xukuno dhicis ah.

Aqoon-is-weydaarsi

8.2 Waayo-aragnimo Wadaag: Kuma ayaa qabtay Wax?

Wakhtiga: 75 Daqiiqo

Ujeedo

Layligan, waxa uu ka ccwinayaa ka qaybgalayaasha siday u ogaan la haayeen ilaa xadega u leeg yahay hannaanka caadiga ah ee mas'uuliyada qorshaynta maaliyada iyo maareynta ee ay wadagaan dawladahoodu. Hal faa'iido oo uu leeyahay layligani waxa u yahay inuu dareen-siiyo xildhibaanada qaybta maaliyada waxa u yahay waxa iyaga laga filayay inay ka qabtaan, iyo waxa u yahay waxa ay ka filayaan inay ka qabtaan kuwa kale. Layligan ka qaybgalayaashu waa in la siiyo oo la siinin wax nuxur cashir ah, mar haddii layligan looga dan lahaa/jeeday in lagu soo saaro waayo aragnimadooda halkii laga tusi lahaa qaab sax ama khalad ah.

Geedi-socod

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Khariidad masuuliyadeedka maaliyada waa in horey loo diyaariyaa sida hoos ku muujisan. Wax ka bedelka sharaxa shaqada ama xilalka mas'uuliinta haday timaado baahi durfo jira awgeed waxba kuma jabno.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

31

Ha nuqalka khariirada ah sii ka qaybgala kasta ka codso inay akhriyaan hawl kasta bayaankeeda, si ay u sheegaan/codeeyaan ka u yahay mas'uulka u fuliya hawshaas magaalooyinkooda – ka codso inay tusmeeyaan u doorista meesha X la dhegayo labo jibaaranaha ka soo horjeeda hawsha iyo mas'uulka mas'uuliyadiisa ay hoos imanayso. Ka codso ka qaybgalayaasha inay sii wadaan ka shaqeynta khariirada ilaa hawl kasta laga calaamadeeyo "X" si loogu magacaabo mas'uulka fulinaya. Waa in xoog la saaro war celinaha ka qaybgalayaasha siday u gudbin la haayeen – qofkeebaa ka mas'uul ah fulinta shaqo kasta, oo qyna ahayn "qofkeebaa ka mas'uul noqondoona". Cashirkan ka hor, ku sawir jaantuska habka cabbirka – balaadhan oo lagu muujinayo warqad balaadhan. Marka mid kasta ka qaybgalayaashu gaarkood u dhammeeyaan jaantuska, ka codso inay gacmahooda kor ugu qaadaan mid kasta mas'uulka ka mas'uul ah shaqada kowaad. Natiijada u qor habka lagu muujinayowarqad balaadhan. Waa la sii wadayaa ilaa dhamaan xogta shaqo kasta la qoro. Kala dood natiijooyinka iyadoo la isticmaalayo su'aalaha hoos ku taxan ama kuwa kale:

1. Sidee bay isu-ekaanshaha natiijooyinku yihiin ama uga gedisan yihiin wixii aad filanayseen
2. Hannaanka guud maxay tahay dariiqada uu uga ka gedisan yahay dariiqada xilalka

Aqoon-is-weydaarsi

loo qoondeeyay qorshaynta maaliyadeed iyo maareynta hay'adhiina.

3. Maxay yihiin saamaynaha laylikan uu ku yeelanayo xildhibaanadiina xilkooda xooleeye.

Wakhtigu haddii uu saamaxo, waxaad u soo jeedin kartaa inay dib u soo celiyaan jaantuskahooda si loo Qeexo:

1. Waa kuwee shaqyyoinka ay ka qayb-qaateen si ayna ahayn inay ka qayb-qaataan, iyo
2. Waa kuwee shaqooyinka ayna ka qaybqaadanin si ay aheyd inay ka qayb-qaataan.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Aqoon-is-weydaarsi

Jaantuska Xilka Maaliyada

1. Xildhibaanka la soo doortay
2. Agaasimaha maamulka
3. Lacag-haye/yaha
4. Hanti-dhowre
5. Madaxda qaybaha
6. Kuwa kale
7. Lama yaqaan

Hawlaha	1	2	3	4	5	6	7
1. Diyaarinta bayaano maaliyadeed, jadwalada & warbixinada							
2. Haya diiwaanada xisaabadka guud							
3. Isku xidhka dukumentiga miisaaniyad sannadeedka							
4. Diyaarinta warbixinada miisaaniyad fulinta xiliyaysan							
5. Diyaarinta xaashiyaha wakhtiga ee todobaad/bilood leh							
6. Joogtaynta tirinta hantida maamulka							
7. Ururinta dhammaan wixii lacaga-yow lagu leeyahay maamulka dawlada hoose							
8. Ogolaansho lacagta digaalka in loo bedelo Raasamaal							
9. Qiimeynta iyo warbinta ka sameyn xaalada maaliyadeed ee dawlada hoose							
10. Doorista hannaanka miisaaniyada ee ay isticmaalayaan maamulka dawlada hoose							
11. Diyaarinta lacagta maalgelinta ee ay u baahan yihiin maamulka dawlada hoose							
12. Aqbalida xuduudaha kharash garaynta ama dhimista adeegayad							
13. Diyaarinta iyo qaybinta warbixin maaliyad sannadeedka							
14. Aqbalida miisaaniyad sannadeedka saamiga ka cashuurta, iyo qaabka lacag bixinta							

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Aqoon-is-weydaarsi

15. Diyaarinta dakhli sannadeedka iyo qiyaasaha kharashyada
16. Awbalid bixinta deynta muddada dheer
17. Go’aansashada maalgelinaha waxtarka leh ee lacagta raasamaalka ah
18. Go’aan minta hawl fulinaha maaliyadeed inay haboon yihiin iyo in kale
19. Aqbalida bixinta lacagta lagu soo iibiyay waxyaabihii
20. Isku hagaajinta mashaariicda si loo xaliyo sandullaynaha miisaaniyada
21. Daba-galka hawl fulinaha miisaaniyada oo si joogto ah
22. Ku diyaarinta miisaaniyada foomamka codsiga
23. Wax ka qabashada moranada/khilaafyada ay cashuurtu la timaado/keento

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Aqoon-is-weydaarsi

8.3 Cashar-bixinta (Bandhiga) Tababaraha

Wakhtiga: 30 Daqiiqo

Ujeeddo

Cashir bixintani waa inay ka qaybagalayaasha siiyaa-afkaar iyo muuqaalada dhan kasta uu yeelan karo xilka xooleeye iyo gun nuxureed ay ku isticmaali karaan layliyada – qof-qofka ah ama kooxaha ah ee ku jira kulan-barashadan.

Geedi-socod

Diyaare cashir bixin ku salaysan macluumaad (xog) laga soo dheegtay curiska soo socda ee xilka xooleeye. Gaar-ahaan, hannaanka miisaaniyadsannadeedka oo dib-u-hubin lagu sameeyo iyo muhiimada ay leedahay ka fikirida “qorshaha-dheer” ee maal-gelinaha raasamaalka iyo maalgelinta kaabayaasha adeega. Ka dooda miisaaniyada iyadoo loo eegayo siyaasad maaliyadeedka iyo sida xilkhibaanadu qudhadoodu ay u diyaarin karaan si ay u qaadaan culayska maaliyadeed ee bulshooyinkooda.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Kaadhadhka xussuus qorka xogta sharaxa guud laga ka bixiyay waxay kaa caawin kartaa si aad u dabooshid xog nidaamaysan iyo si aad ula socotid jadwalka shaqada. Cashir bixinta gudaheeda wa in mar kasta ka qaybgalayaasha su’aalo la waydiiyaa si loola socdo fahankooda iyo si loo hanto feejignaantooda (ay cashirka ay siinayaan). Cashir bixinta waa in lagu ladhaa qalabka kaabe arageed (visual aids) ay ka mid yihiin warqadaha bal-balaadhan oo horey wax loogu sii qoray/daabacay, iyo warqadaha xaliiban (transparency sheets) ee mishiinka wax-gudbiya lagu isticmaalo (overhead machine), oo kaabe dheeraad u ah fahanka.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

36

Aqoon-is-weydaarsi

8.4 Xaalad Dersid: Qiimeyn Siyaasad Cashuureed oo aan u-la-kac-ahayn

Wakhtiga: 90 Daqiiqo

Ujeedo

Sidii aan ku soo falanqeyney buug tababar oo hore, Siyaasad waa bayaan ku saabsan awood (waxqabad) iyo ku-talagalka dawladu ugu adeegeyso aasaaska mashaariic iyo adeegyo cusub. Caadi ahaan siyaasada waa mid laga baaraan degay, hadaf cad leh oo lagu talagalay. Laakiin siyaasadaku wuxuu noqon karaa mid aan kulagal ku iman, ee ku yimaada ilduuf (kama) ama dayac goluhu keenay. Sida ayuu tusaalahan ku arki doono, Siyaasadka aan ula-kaca-ahayn ee kala fadilaya dadka marka dame wuxuu dhaawacaa awooda dawlada hoose ay ku bixineyso adegyada loo baahan yahay.

Geedi-socod

Ka-qayb-gale kasta waxa aad siisaa nuqul tusaalaha la yidhaahdo Siyaasadka aan ula-kaca ahayn ee cashuur qiimeynta Choumohani. Far in ay akhriyaan tusaalaha. Dabadeedna ayaga u qeybi afar ama shan kooxood oo yar yar. Koox kasta ka dalab in ay ka soo jawaabaan saddexdan su'aalood ee tusaalahan ka dambeeya dabadeedna warbixinta jawaabahooda ha ku soo celiyeen 40 daqiiqo.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Marka ay soo noqdaan, koox walba weydii sida ay uga jawaabeen su'aal kasta. Dhiirigeli in si guud loo falanqeeyo la isbarbar dhigana aragtiyadooda kala duwan.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Aqoon-is-weydaarsi

Layli

Qiimeyn Siyaasad Cashuureed oo aan u-la-kac-ahayn ee 'C

Ninka Sree Gobinda waxa uu leeyahay warshad sifeysa saliida geedka "Mustard" oo kufadhida dhul dhan 2.2 aykar (acres) oo qaali ah oo ku yaala badhtamaha magaalada "Choumohani". Warshadu waxa ay astaan u tahay nashaadka iyo dhaqdhaqaaqa ganacsatada oo mudaba ka faa'iideysaneyey xasiloonida dhaqaalaha iyo lacagtoodaba (taka). Intaa wax dheer, ayada oo si fiican looga mililicsan karo sida fursadaha loo lumiyo ama loo khiyaameeyo marka la go'aaminayo maalglinta mashaariicda iyo adeeggada dadweynaha.

Xaalada

Sree Gobin waxa uu gorgortan adag la galay guddida dib-u-eegida qiimeynta (hantida) isaga oo ka cabanaya inta uu ku qiimeeyey (warshadiisa) xafiiska qumeynta ee dawlada hoose. Xafiisku waxa uu ku qumeeyey warshadaa 142,000 TK, guddida dib-u-eegida qumeyntuna waxa ay hoos ugu soo dhigtay 10,000 TK oo ah boqolkii todoba qiimeyntaa hore. Qiimeyn cusub (lix sanno dabeedeed) oo uu sameeyey xafiiska qiimeynta ee warshadaa, oo aan weli laga doodin dibna loo eegin waxa lagu cayimay 231,000 TK. Warshad yar oo kale oo ku taala meel aan ka dheereyn ayaa guddu u goysey 5,000 TK oo ah noqoneysa boqolkiiba 12 qiimihii xafiisku u gooyey. Qiimaynta cusub ee warshadaa yar waxa laga dhigay 93,000TK.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Waxa ay u muuqataa in guddida dib-u-eegidu aanay lahayn hab-isku mid ah oo ay ku gaadhaan qiimeynta hantida la cashuurayo xataa kuwo isku midka ah. Natiijadu waxa ay noqotay in ishan oo cashuur fiican ay ka heli kari lahayd dawlada hoose in ay ku weydo habkan dib-u-eegista. Laakiin raadraaca qiimeyntu wuxuu muujinayaa daaqad furan oo dabagal iyo baadhitaan lagaga sameyn karo sida ay u shaqeyso habka go'aan gaadhista ee magaaladan. Waxa soo socda faahfaahin ku saabsan cawaaqibka habka qiimeynta.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Waxa ay u muuqata in habka qiimeynta hantida uu si xirfad leh u qabto xafiiska qiimeyntu. Lalakiin uu noqdo dhalanteed been ah marka uu soo gaadho guddida dib-u-eegida. Guddidu waxa ay ka kooban tahay afar xubnood, gudoomiye, hal xildhibaan, qareen (lawyer) & ingineer. Guddidu waxa ay shaqeysay ku dhawaad laba bilood oo ay dhaqgeysaneysay rafcaanka hantiilayaasha. Sida uu yidhi qiimeeyuihu, hantiilayaashu gaar ahaan kuwa lacagta badan, waxa ay dalbaan dib-u-qiimeyn. Tusaalahan soo socda, oo ku qoraa raadraaca qiimeyaha , wuxuu tilmaamayaa guulaha kala gedisan ee ay hantilayaashu ka gaadheen guddida dib-u-qiimeynta. Kuma jirto hanti kaliya oo qiimaheedii la kordhiyey mudadii la qiimeyneyey.

	Sannadka 1aad		Sannadka 6aad
Nooca dhismaha	Qiijmeynta la soo jeediyey	Qiimenta dib-loogu-noqday	Qiimeynta la soo jeediyey
Warshad weyn oo salida sifeysa	142,000	10,000	231,000
Warshad yar oo salida sifeysa	41,000	5,000	93,000
Tukaan yar oo tafaariiqle ah	265	265	819
Warshad looxaanta oo dhexe	22,000	5,000	48,880
Tukaan iibiya qalabka xafiisyada stationary	270	540	2,025
Dhisme ganacsi oo dabyo ah	16,300	8,000	88,000
Guri (ganacsade weyn)	55,000	8,500	237,216
Guri (tukaanle yar)	1299	650	4,875

Su'aalo

1. Waa maxay siyaasada sida daban uga muuqata habka ay raaceen guddida dib-u-eegista qiimaha si ay hoos ugu dhigaan qiimaha hantida? Su'aashan marka aad ka jawaabiyso ku xisaabtan shantan male (assumption) ee soo socda ay guddida dib-u-eegista qiimeynta ay u eg tahay in ay ka duulayeen.
   - ∉ Qiimahanu hantiluhu ku qiimeeyay hantidiisa ayaa ka muhiimsan ta qiimeeyaha xirfadlaha ah.
   - ∉ Hantilayaasha cabanayaa waxay xaq u leeyihiin in hoos loo dhigo qiimeynta hantidooda.
   - ∉ Looma baahna in qiimaha hantida la bedelo (hoos loo dhigo) ilaa u hantiluhu soo cawdo.
   - ∉ Hantiilayaasha waaweyn oo uga muhumsan dadweynaha kuwa hantida yar waxay mudan yihiin in ay helaan dib-u-qiimeyn hoose oo weyn.
   - ∉ Hantilayaasha waaweyni waxaay dadweynaha ku dhex leeyihiin awood weyn oo aanay joojineyn "maya waxaad dooneyso".

2. Waa maxay fursad ku luntay ama lagu waayey natiijada siyaasadan maldahan, muxuuse noqonoyaa cawaaqibka (cidhibta) dambe ee malgelinta mashaariicda iyo adeegyada dadweynaha ee Choumohani?

3. Haddii aad ahaan lahayd xubin ka tirsan golaha Choumohani maxaad yeeli lahayd si aad u daaweyso (saxdo) xaaladan?

Aqoon-is-weydaarsi

8.5 Layli: Qiimayn Xaalada Maaliyadeed

Wakhtiga: 90-120 Daqiiqo

Ujeedo

Cid (koox) kasta oo maamushaa waxay si weyn u daneysaa awooda maaliyadeed ee ay dawlada hoose (b) ku socodsiin karto heerarka adeegyada jira, (t) ku wajihi lahayd khalkhalka dhaqaalaha deeyaanka, ku dhaca & (j) iskaga caabiyi lahayd culayska koboca iyo hoos u dhaca (dhaqaale). Xildhibaanka xil-kaska ahi bartaa oo u dhaqan geliyaa hababka la xaqiijiyey ee lagu qiimeeyo xaalada maaliyada.

Layligani waxa uu siinayaa ka-qaybgalayaasha fursad ay ku bartaan qiimeynta xaalada maaliyadeed ee dawladooda hoose iyo in ay gartaan dhibaatooyinka la xidhiidha kharashka iyo dakhliga.

Geedi-socodka

U diyaari ka-qeyb-galeyaasha warkshopka liis-hubineed lagu lafo-gurayo qaabka iyo muuqaalka kharashka. Liis-warbiixineedka soo socda waxa uu ka kooban yahay dhibaatooyinka u badan ee dakhliga iyo kharashka iyo qiyaas cabireed lagu kala saareyo muhimada iyo xasaasiyada ay leedahay dhibaato kastaa. U sheeg ka-qayb-galeyaasha in ay akhriyaan filmaan-bixiyaha (instruction) dabadeedna dhamaystiraan lii-warbixineedka.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Marka ka-qeyb-geleyaashu ay dhameystiraan liis-hubineedka ee ay isku geeyaan wadarta dhibaaha lagu qiimeeyey dhibaato kasta, dabadeed haka jawaabaan su'aalaha soo socda ee ku saabsan dhibaatada ugu dhibaha badan (ama dhibaatooyinka haddii ay isku dhibco yihiin.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Su'aalo:

1. Maxay tani u noqotay dhibaatada ta uga xasaasian/muhiimsan dhibaatooyinka idinka haysta dakhliga? (jawaab uu bixin karo ka-qeyb-gale ayaa noqon karta in dakhliga ka soo baxa dhisme weyn oo cusub oo lagu madadaasho aanu dabooli Karin kharashka ku baxa).

2. Maxay tani u tahay dhibaatada ugu muhiimsan/xasaasisan ee dhibaatooyinka kharashka dawladiina hoose? (jawaabtu waxay noqon kartaa deeq la idiin siiyey in aad ku dhistaan warshad bulaacadeed (lagu sifeeyo) oo cusub ayaa sababtay culays kharash aan la awoodi Karin oo lagu socodsiiyo laguna dayactiro).

Aqoon-is-weydaarsi

Liis-hubineed lagu lafo-gurayo Xaalada Maaliyadeed ee Hay'adiina

Tilmaan

Liis-hubineedka soo socda waxa uu ka kooban yahay sided bayaano masalooyin oo ku saabsan qaabka dakhliga iyo sided kale oo ku saabsan muuqaalada kharashyada. Liis-hubineedka waxa looga jeedaa in uu kaa caawiyo sidaad u heli lahayd dhibaatooyinka maaliyadeed ee had iyo jeer ka jira hayadaha tiina oo kale ah.

Si aad u isticmaasho liis-hubineedka akhri bayaan masalo kasta. Haddii aad rumeysan tahay in bayaanadani in muujineyn dhibaato ka jirta hay'adiina, calaamadi sanduuga "Maya" una gudib ta ku xigta. Dhinaca kale, haddii aad rumeysantahay in ay muujineyso dhibaato ka jirta hay'adiina, calaamadi sanduuqa "haa". Deedna ka dooro hal tiro hal iyo shan ta muujineysa sida xasaasi u tahay (u baahan in si deg deg ah wax looga qabto shido iyo xadad deg deg ah oo la arkeyo) si dhibaatadan wax looga qabto.

Marka aad taa sameyso, sidaa oo kale u qiimee si aad u muujiso sida ay muhiim u tahay (cawaaqibka dambe ee ay ku yeelaneyso fayoobaanta iyo wanaaga hayadiina) in laqaado talaabo lagu wax lagaga qabanayo dhibaatooyinkan. Iska dhafo tirooyinka aad calaamadisay dabadeedna ku qor wadarta halka loo baneeyey. U gudbi ta ku xigta adiga oo jidka raacaya ilaa aad 16kd bayaan aad ka wada jawaabto.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Aqoon-is-weydaarsi

Liis-hubineed

Dhibaatooyinta Dakhliga

	Dhibaato ma tahay?	Haddii ay "haa" tahay ma Xasaasibaa?+,muhiimba?=
1. Gundhiga cashuurta oo sii xumaanaya	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
2. Qorsha –hawleed ama nimaad gudaha ah oo si daran u saameysa dakhliga	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
3. Qorshe – hawleed ama sharci debada ah oo si daran u sameeysa dakhliga	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
4. si weyn ugu tiirsan illo dakhli oo wakhtigoodii dhamaaday ama kuwo dibadeed.	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
5. Ujuurada laga qaado daka isticmaala adeegyada oo aan ku filayn kharashka ku baxa.	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
6. Il dadkhli oo muhiim ah oo khasaarta	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
7. Dhaqaalaha degmada oo hoos u dhaca	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
8. Hababka saadaalinta dakhliga oo liita	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed	
Tababarka Hoggaanka la soo doorto	
42	

Aqoon-is-weydaarsi

Dhibaatooyinta Dakhliga

	Dhibaato ma tahay?	Haddii ay "haa" tahay ma Xasaasibaa?+muhiimba?=
9. Kor u kac kharash oo aan la fileyn marka loo eego dakhliga	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
10. Kharashka soo noqnoqoda oo si aan la fileyn kor ugu kaca	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
11. Dabagalka miisaaniyada oo liinta	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
12. Wax-soo-saarka shaqadaha oo hoos u bata oo la iman doon kharash ku baxa	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
13. Mashaariicda oo si xad-dhaaf ah u bata oo la imandoon kharash ku baxa	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
14. Kharash aan la odorosin oo ka dhasha aafooyinka dabiiciga ah	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
15. Leex laaxinta ama isku bedbedelka kharashka oo aad awoodi kari weydo kharashka soo noqnoqonaya (mahuraanka ah oo kordheya awgeed	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=
16. Qaangeshi bixinta mustaqbalka oo si kadis ah kor ugu kaca	haa maya mooyi	1 2 3 4 5 hoos sare _____ x _____=

	Haddii ay "haa" tahay ma Xasaasibaa?+muhiimba?=
	1 2 3 4 5 hoos. sare _____
	1 2 3 4 5 hoos. sare _____
	1 2 3 4 5 hoos. Sare _____
	1 2 3 4 5 hoos. sare _____
	1 2 3 4 5 hoos. sare _____
	1 2 3 4 5 hoos. sare _____
	1 2 3 4 5 hoos. sare _____
	1 2 3 4 5 hoos. sare _____

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Aqoon-is-weydaarsi

Marka ay ka qeyb-geleyaashu ay dhameys tiraan hawshan oo tilmameysa kuwa ugu sarreeya (ugu xasaasisan uguna muhiimsan) dhibaatooyinka dakhliga iyo kharashka, u qaybi kooxo mid waliba ay saddex tahay. U sheeg in koox kasta ay doortaan hal dhibaato oo ah ta ugu sarreysa liiska mid ka mid ah dabadeed ay falanqeeyaan waxa lagu xalin karo. (fiiro: fikrad-abuur/waday-brainstorming – waa xeelad waxtar leh oo si dhakhso ah loogu keeni karo fikrado badn oo lagu xaliyo dhibaato). U sheeg in ay ka sidaa oo kale uga shaqeeyaan dhibaatooyinka ugu sareeya saddexdooda mid walba. Dabadeedna sidoo kale dhibaatada labaad ee ugu sareysa midwalba taxanihiisa (liiskiisa). Haddana ta saddexaad. Xasuusi koox kasta in ay ku xisaabtamaan wakhtiga si ay ugu helaan fursad ay ku falanqeyn karaan dhibaatooyinkaa midkasta. Saacad sii hawshan.

Saacad dabadeed isugu wad yeedh si ay u falanqeeyaan waxtarka layligan iyo lii-warbixineedkan sid ay u yihiin wado lagu qiimeyn karo xaalada maaliyadeed ee hay'adooda. Haddii wakhtigu ogolaan karo, ku soo dhawe qaar ka mid ah kooxaha yar yar in ay ka badlaan xalalka (xalka) qiimaha leh ee ay heleen inta ay hawshan ku jireen.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Aqoon-is-weydaarsi

8.6 Layli: : Lafo-gurista Bayaanka Maaliyadeed

Wakhtiga: 60-75 Daqiiqo

Ujeedo

Layligani wuxuu siinayaa ka qeyb-geleyaasha waayo-aragnimo ay ku lafo-guraan bayaanka maaliyadeed ee dawlada hoose.

Geedi-socodka

U qeyb ka qeyb-geleyaasha dhaw kooxood oo yar yar. Koox kasta waxa aad siisaa bayaan maaliyadeedka dawlad hoose (ka eeg boga kale). Waxanu ka kooban yahay: (b) dakhliga iyo kharashka xaqiiqada ah oo ah ee maaliyada sannadkii hore. (t) Qorshe-miisaaniyadeedka dakhliga iyo kharashka sannadkan iyo (j) waayo-aragnimada qayb kasta ee lixda bilood ee hore (laba saddex-bilood)

Far koox kasta in ay darsaan bayaanka oo ah helaan iswaafaqla'aan ka jirta dakhliga iyo kharashka. Sidoo kale, weydii koox kasta in ay maleeyaan (qiyaasaan) sababaha keeni kara iswaafaq la'aanta. Sii koox kasta 45 daqiiqo oo ay ku dhameystiraan hawshan. Dabadeedna dib isugu yeedh kooxaha oo mid walba ha soo bendhigto wixii ay heleen.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Bayaan Maaliyadeedka ee Sanadalaha ah

B. Dakhliga

Waxyaha	Dakhliga Sannadkii Hore	Qorshe-miisaani-yadeedka dakhliga sannadkan	Dakhliga saddex biloodka koowaad+	Dakhliga saddex bil labaad+
- Suuqyada	191,200	175,868	50,300	27,900
- Meelaha Basaska la dhigo	26,144	50,000	24,300	26,900
- Xero dhiigta	17,365	25,200	6,200	6 ,950
- Qashin ururuin qaadis	51,727	90,000	22,350	5 ,850
- Adeega biyaha	638,280	700,000	175,250	173,390
- Kirada guriyaha	201,243	220,000	40,292	53,256
- Guriyeynta	753,000	312,000	312,000	000
- Liisamada (brewery)	1,200	1,200	900	350
-Tukaanada (tumalaha)	25	50	10	000
- Ganacsadayaasha lafaha (bone)	5	10	00	000
Liisamada hoy' yada jiifka	2,100	1,850	500	350
Isugeyn	**1,882,289**	**1,576,178**	**632,102**	**294,946**

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

T. Kharashka

Nooca Kharashka	Kharashka Sannadkii Hore	Qorshe-miisaani-yadeedka kharash sannadkan	Dakhliga saddex biloodka koowaad+	Dakhliga saddex bil labaad+
- Mushahaarooyin	2,268,592	2,936,000	734,000	1,545,396
- Shidaal, saliid & taayiro	15,000	15,078	6,626	3,753
- Daabacaada & Xayaysiiska	4,146	4,800	1,360	2,493
- Boostada &				

telifoonada	10,130	10,325	2,335	4,937
- Kharashka & gunnooyinka xildhib.	11,221	22,000	4,300	21,929
- Dayactirka gaadiidka	7,331	5,200	1,397	3,967
- " dhismaha	3,096	1,090	217	389
- Laydhka & biyaha	10,500	11,300	2,860	5,730
Isugeyn	**2,330,016**	**3,005,793**	**753,096**	**1,588,594**

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Aqoon-is-weydaarsi

8.7 Layliga Xirfad gudbinta

Wakhtiga : 30 – 45 daqiiqadood

Ujeedada

Layligani waxa uu ka caawinayaa ka-qeybgalayaashas waayo-aragnimada ay ku barteen weershopkan in ay u bedelaan kuna dabaqaan hawlaha runta ee ay qabtaan. Ahmiyada layligani waa kor-u-qaadida rajooyin, u hawl-galka qorshe meel mar ah, iyo ballan-qaad shakhsiyeed. Hawlaha badankooda waxa qabta shakhsi (qof) iskaashi la leh lana wadaagaya shakhsiyad kale.

Faraqweyn ayaa u dhaxeeya garashada iyo fulinta

Guud ahaan waxa la isku raacsan yahay in ujeedada tababarku ay tahay la hagaajiyo (hore-u-mariyo) sida dadku wax u qabtaan ayada oo la tusayo si ka fiican. Run ahaantii guusha tababr laga gaadho waxa laga qiyaasi karaa koboca iyo isbedelka shakhsiga ku dhaca marka tababarku socdo iyo marka uu dhamaado dabadeed.

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Way yar tahay inta tababarku raad ku yeesho ka-qeyb-geleyaasha sida ay rajiynayaan tabebarayaashu, gaar ahaan marka tababrku qaatey saacado yar. Riyaaqa markaasi hore ayuu u suulaa marka qofkii la tababray ay ka hor yimaadaan caadooyinkii hore ee shaqada iyo aabiga dadka ay wada shaqeeyaan ee aan tababarka la gelin.

Dhinac kale haddii aynu u dhigno, niyada iyo go'aanka lagu gaadhay in wax la barto sidii horena wax laga bedelo marka la xidhayo weershabka ayaa caawin kara ka-qeyb-geleyaasha in ay ka jibo keenaan (ka gudbaan) kalsooni la'aanta naftood iyo goobta shaqadaba.

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Tababarayaashu waxa ay ku caawin karaan ka-qeyb-gelayaasha in ay ka lib keenaan marxaldan ay uga kala gudbayaan barasho iyo ku dhaqan iyo hirgelin ayaga oo siiya layliyo qorshayn oo fudud. Sidan bal uga fikir. Wakhtiga ay qaadato in lagu dhiiri-geliyo sida loogu bedelo wixii la bartay in lagu dhaqmo waxa ay noqon kartaa faraqa u dhexeeya arrimo (fikrado) xiiso leh oo si kooban loo bandhigayo iyo waayo-aragnimo nolosha wax ka bedeleysa.

Aqoon-is-weydaarsi

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Geedi-socodka

Ugu yaraan saacad badhkeen ku qaado gabogbada weershobka in aad ku sugto dareenka ka-qeyb-geleyaasha ahmiyada waxa ay barteen kuna dhiirigeliso in ay ku tijaabiyaan waxaa ay barteen hawlaha golehoodo. Ku bilow adiga oo siinaya 15 daqiiqadood ka qeyb-geleyaashu in ay gooni gooni uga shaqeeyaan su'aalaha dhaqan-gelinta (wax) barashada.

Markay dhammeeyaan, u sheeg in ay isdhaafsadaan kooxda laba ama saddex wax oo ay ku talo jiraan in ay u qabtaan si ka duwan sidii hore si aad u xidho weershobka.

Aqoon-is-weydaarsi

Su’aalaha Gudbinta Waxbarashada

dhaw daqiiqo ka fikir sida aad uga rayi bixin lahayd kaalinta maalgeliyaha, fikrada cusub ee aad kala kulantay weershobkan iyo sida aad u dareentay. Dabadeedna waxa aad qortaa weedh ama laba aad ku sharaxayso wax xiiso leh oo aad adiga laf-ahaantaad aad iska baratay intii weershobku socday.

_____

_____

_____

Adiga oo ku saleynaya wixii aad iska baratay lafahaantaada iyo isbedelada badan ee aad ku sameyn karto naftaad ee weeshobkani kuu bandhigay, waa maxay saddex wax ee aad ku talo jirto in aad u qabato si ka gedisan sidii hore kaalintaada maalgeiye?

1. _____

2. _____

3. _____

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

ugu dambeyn, maxay yihiin dhibaatooyinka (caqabadaha) aad fileyso in ay ka hor yimaadaan laf-ahaantaa ama goobta shaqada inta aad ku gudo jirto hirgelinta isbedeladaa? Maxaad yeeli si aad uga gudubto ama uba yareyso culayska dhibaatooyinkaa (caqabadahaa).

Caqabado	*Falka aad kaga gudbi karto*
1. _____	1. _____
2. _____	2. _____
3. _____	3. _____

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Haddii aad baran karto, waad qaban kartaa

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Aqoon-is-weydaarsi

Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Mas’uul Maaliyadeed

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

52

XARUNTA QARAMMADA MIDOOBAY EE DEGSIIMADA AADANAHA (HABITAT)

S.BOOSTA 300030, NAIROBI, KENYA
Telifoon: (254-2) 621234, Telex: 22996 UNHAB
KE,cable: UNHABITAT FACSIMILE: (254-2) 624266/7
(CENTRAL office), 624262 (ADM), 623263/4 (TCD), 624265 (RDD).

PRIORITY ONE WORDS

ENGLISH	**SOMALI**
1. Accountability	-**Xisaabtan**
	-Xilkaa Saaran yahay
2. Action plan	-**Qorshe hawleed.**
	-Wax-qabad hawleed
3.Active Listening	**-dhegaysi feejigan**
	-Dhegaysi Darban
	-Dhegaysi Mug leh.
4.Alternative	-**Kala Doorasho**
	-Wax bedeli kara wax kale
5.Application	-**Arji**
	Codsi
	Adeegsi
6.Assessment	-**Qiyaasid**
	-Qiimayn
7.Authority	-**Suldada**
	-Awood xukun
8.Awareness	- **Wacyi-galin**
	-Ka war qab
9.Basic Education	-**Wax-barasho Asaasi ah.**
10.Benificiery	-**Dan ku Qabe**
	-Ka faa'iidayste
11.Cabacity Building	-**Kobcin wax Qabad**
	-Awood dhisid.
12.Case Study	-**Daraasad Xaaladeed**
13.Chick list	-**Liis Hubineed**
14.Civic	**-Madani**
	-La xiriira magaalo
	-muwaadin
15.Collaboration.	**-Gacan siin**
	-Wada shaqayn
	-Is Caawimid
16.Commitee	**-Guddi**
17.Communicator	**-Gaarsiiye**
	-Isgaadhsiiye
18.Community	**-Beel**
	-Jaaliyad

19.Community Development	-**Horumarin Beeleed**
	-Horumarin Jaaliyadeed
20.Concepts	**-Figrado**
	-Aragtiyo
21.Conceptual Hat Rack	-**Figrada Metalaada Xilaalka**
22.Conflict	-**Is-qabad/**Khilaaf
	- Iska hor imaad
23.Consensus	**-Rayi la isku raacay**
	Aqbalaad figrad guud
24.Consequently	**-Natiijo**
	-Cawaaqib
25.Constituency	**-Dagaan Doorasho**
26.Co-operation	**-Iskaashi**
	Wada shaqayn
27.Council	**Gole**
28.Councilor	**Xil-dhibaan Degaan**
	Xubin ka tirsan Gudiga degaanka
29.Counter productive	**-Maax Dumin**
	-Lid ku ah.
30.Criteria	**-Cabirka wax lagu saleeyo**
	Qoddobbo wax lagu saleeyo.
31.Criteque	**-Wax lagu Saleeyo**
32.Decion Maker	**-Goa'aamiye**
33.Definition	**-Qeexid.**
34.Delegation/Delegate	**-Wefti**
	-Ergo
35.Democracy	**-Demoqraadiyad**
36.Description	**-Tilmaan**
	-Sifo
	-Sharax
37.Dialogue	**-Wada Hadal**
38. Effective	**-Wax ku ool**
	-Sidii la rabay wax u tarid.
39.Effective leadership	**-Hogaaminta wax ku oolka ah.**
40.Effeciency	**-Wax qabad fiican leh**
41.Elected Leadership	**-Hogaaminta la doortay**
42.Empower/Empowerment	**-Awood siin**
	-Awood u fasaxid

43.Enabler/Enable	**-Awood siin**
	-Karti siin
44.Essay	**-Qormo**
	-Maqaal
45.Ethical	**-Hab-dhaqan**
46.Evaluation/Evaluate	**-Qiimayn**
47. Evaluation Survey	**-Qiimayn Sahan**
	-Baaritaan qiimayneed
48.Exercise	**-Layli**
49Facilitator	**Fududeeye/**Sahle
50.Feed back	**War Celin**
	Jawaab Celin
51.Financier	**-Masuul Maaliyadeed.**
52.Gender	**-Jandar**
53.Goal	**-Hadaf**
	-Gool
54.Good Governanace	**-Hab Xukun Wanaagsan**
	-Hab Maamul
55.Government	**-Xukuumad**
56.Group Discusion	**-Dood kooxeed**
57.Guide	**-Tilmaamid**
	-Hage
58.Hand Book	**-Tilmaan Bixiye**
	-Tilmaame Bare.
59.Human Resources	**-Khayraadka Dadka**
60.Human Settlement	**-Degsiimooyinka Aadanaha**
	Degaamayn
61.Implementation	**-Hirgalin**
	-Fulin
62.Information	**-Xog**
	-Wargelin
63. Institution	**-Haya'ad**
64. Institution Builder	**-Haya'ad Dhise**
65.Institionalize	**-Haya'deeye**
66.Instruction	**-Amar**
	-Wax barasho
	-Wax barid
67.Key Point	**-Qoddobbo Muhiim ah.**
	Qoddobbo Ma Dhaafaan ah

68.Leadership Process	**-Geedi socod Hoggaamineed**
69.Learning	**-Barasho**
	-Wax Barasho
	-Tacliin Barasho
70.Learning Objective	**-Ujeeddooyinka Barashada**
	Yoolka Barashada
71.Local Government/Authority	**-Dawladda Hoose**
72.Majority	**-Aqlabiyad**
	-Inta Badan
73.Management Process	**-Geedi Socodka Maaraynta**
74.Meeting	**-Kulan**
	-Shir
75.Minority	**-Inta Yar**
	-Laga tiro yar yahay
76. Minutes	**-Hadal Qor**
	-Hadal qoraal
77. Mission	**-Ergo**
	-Risaalo
78. Monitoring	**-La socod**
	-La saan qaad
79. Negotaition/Negotiator	**-Wada Xaajood siiye**
	-Wada Hadal siiye
	-Gorgoriye
80. Networking	**-Shabakadeyn**/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya
81.Organization	**-Urur**
82. Over seer	**-Korjooge**
83. Over view	**-Dulmar/**Guud Mar
84. Participants	**-Ka-qayb-galayaasha/**Kaqayb-qaatayaasha
85. Perception	**-Faham/**Dhugmo/Garasho.
86. Performance	**-Waxqabad/**Fulin Hawleed.
87. Perspective	**-Ka eegid wajio kala duwan.**
88. Policy	**-Qorshe Hawleed/**Khidad/Siyaasad
89.Policy Maker	**-Siyaasad Dejiye**
90. Power Broker	**-Awood wax ku qabte/**Awood adeegsade

91. presentation	**-Soo Bandhigid/**Qadimaad
92. Proactive	**-Ka hor dhaaf/**Qorshe Curiye/Qorshe raac
93.Process	**-Geedi socod/**Socodka
94.Questionnairre	**-Weydiimo Qoran/**weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah
95.Quoum	**-Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo**
96.Rational	**-Maan-gal/**Macquul
97.Reactive	**-Falcelin/**Qorshe laawe/Arrin ku baraarug
98.Refrence	**-Tixraac/**Raad raac
99.Reflection	**-ilays noqod/**Humaag noqod
100.Resources	**-Khayraad.**
101.Revenue	**-Dakhli**
102.Role play	**-Door-jelid/**Door ciyaarid
103.Session	**-Fadhi/**Kulan
104.Shared Vision	**-Aragti wadaag**
105.Simple Majority	**-Aqlabiyad hal dheeri ah.**
106.Simulation	**-Iska yeelid/**U ekeysiin
107.Slums	**-Buul caws/**Carshaan/Isku raran
108.Solution	**-Furdaamin/**Xal
109.Stakeholders	**-Daneeyayaal.**
110.Strategic Plan	**-Qorshe istaratijiyadeed.**
111.Strategy	**-Istaratijiyad/**Tab/xeelad
112.Summary	**-Soo koobid/**Khulaaso
113. Symptons	**-Astaamo/** Calaamado
114. Systamatic	**-Habaysan/**Nidaamsan
115.Technique	**-Farsamo**/Xeelad.
116.Training Design.	**JaanjooyadaTababarka**/Naqshadeynta Tababarka
117.Training Material.	-**Agabka Tababarka**/Qalabka Tababarka
118.Traing Need assessment.	-**Qiyaasid baahida Tababarka/**Qiimeynta Baahida Tababarka
119.Transparency.	-**Wax qaris laa'aan**
120.Transparent	-**Qof aan waxba qarinaynin**.
121.Unanimous	-**Loo dhan yahay**/Gedigood.

122.Vision. -**Aragti fog**/Aragti dheer
123.Warm up exercise -**Iskulalayn**/Qandhicin/Diiran
124.Workshop. -**Aqoon Isweydaarsi.**

Priority two words.

125.Acknowledgment -**Garwaaqsi**/Garawsi/Mahad-celin
126.Administrative Fixes. -**Adeegsi**

127.Analysis -**Gorfeyn**/Falanqeyn/Taxliil.
128.Assignment. -**Shaqo Mucayin ah**
129.Assuption -**Maleyn**/Si u qaadasho
130.Benchmark -**Bar qiyaaseed**/Bartilmameed
131.Challenges -**Caqabad**/Loolan/Hardan
132.Collective -**Kooxeed/**Urureed/Wadareed
133.Conceptual frame work -**Gadaan-fikradeed**/Aasaas fik

134.Constructive -**Wax dhisid**/Dhismo-gal
135.Conventional Wisdom -**Xikmad soo jireen ah.**

136.Corruption -**Musuq-maasuq**/Laaluush.
137.Dilema -**Laba daran mid dooro**
138.Diversity -**Kala duwanaan**/Kala gedisnaan
139.Encouraging -**Dhiiri-galin**/Geesinimo galin.
140.Fundamental -**Asal**/Aasaasi.
141.Identification -**Tilmaamid**/Baadi sooc/Aqoonsi.
142.Indivitual Contribution. -**Gacan ka geysi qofnimo**/In qof biiri

143.Infrastructure -**Dhismo-hooseed**.
144.Input. -**Wax galin**
145.*nsight.* -**Aragti Maskaxeed.**
146.Inspiration. -**Maan-godlin**/Ra'yi fiican helid.
147.Interaction. -**Isdhex-gal**/isla fal-gal/Isku dhafmid.
148.Judgement -**Xukun**/Go'aan
149.Land Use Malaise. -**Aafada dhul boobka**/Dhul ku habsa
150.Multipurpose -**Ujeeddo badan**/Ujeedooyin kala du
151.Output. -**Wax ka soo saarid.**
152.Potential Candidate -**Musharax dihin**/Musharax iman kara
153.Pre-training. -**Tababar horaad**/Tababar hortiis.
154.Priority -**Mudnaan**.
155.Problem Solver **Furdaamiye**/Xaliye dhib

156.proficiency	-**Xirfad Hanasho**/Aqoon sare u leh.
157.Public	-**Guud**
158.Public Sector.	-**Qaybta Guud**
159.Public Service	-**Adeeg guud.**
160.Regulation	-**Xeer Hoosaad**.
161.Self Governance.	-**Isxukumid.**
162.Self Introduction.	-**Is-sheegid**/Is-tilmaamid.
163.Self study.	-**Isbarid**
164.Self Assesment	-**Isqiyaasid**/Isqiimeyn.
165.Shirinking Resources.	**-Khayraadka sii yaranaya**
166.Technical	**-Farsamo**/Farsamayn
167Training needs.	-**Baahi tababar.**
Priority three Words	
168.Absolute Poverty	**-Saboolnimo**
169.Absolute	**-Gebi-ahaan**/Buuxda.
170.ApplicationCommitments	-**Nidar-gal**/Daba-qaad ballan
171.Bureaucracies	-**Biroqraadiyad**/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay
172.Caution	-**Taxadar**/Digniin.
173.Density	**-Cufnaan**/Jirmiga shega.
174.Environmental Degradation	-**Hoos u dhac degaan**/Hoos u dhac xaaladda degaanka
175.Equilibrium	-**Dheeli-tir**/Is-le’eg
176.Hawker	-**Ha is wareerin**/Dadka badeecada naadiya
177.Implication	-**Maldahnaan**/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka.
178.Jurisdiction.	-**Haya’addaha Garsoorka.**
179.Legal Requirment.	**-Baahida Sharciyeed.**
180.Legislation.	-**Xeer Degin.**
181.Legitimate	-**Sharci ahaan**/Qaanuun ahaan
182.Matchmaker	**-Isku aadiye wax isku habboon**
183.Misinterpretation	-**Fasiraad xumo**/Fasiraad qaldan
184.Off-spring	**-Farac.**
185.Optimistic	-**Samo-filasho**/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg

186.Partnership	-**Wadaag**/Wada lahaansho.
187.Pessimistic	-**Xumo arag**/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg
188.Phenomina	-**Ifafaalayaal.**
189.Professional	**-Xirfadle**/Xeel-dheeri
190.Recycle	-**Sameyn celin**/Dib u nacfi galin
191.Rules.	-**Qawaaniin**/Xeer
192.Status Quo	-**Xaalad taagan**
193.Stimulation.	-**Xiiso galin**/Fi-fircooni galin.
194.To Wear different Hats.	-**Xilqaad badnaan**/Kaalimokala duwan qaa
195.Waterpolution.	-**Dikhaw Biyood**/Wasakhaw Biyood/Dhiiq
196.Facilitator	**-Fududeeye**
197.Financier	**-Masuul Maaliyadeed**
198.Gender	**-Jandar**
199.Negotiator	**-Wada hadal siiye.**
200.Overseer	**-Korjooge.**
201.Policy Maker	**-Siyaasad dejiye**
202.Power Broker	**-Awood wax ku Qabte.**
203.Institution Builder	**-Haya'ad dhise**
204.Leader	**-Hogaamiye**
205.Leadership	**-Hogaamin**

P.S.

In Each English word or term, the most common and acceptable Somali language definition is the first one, which is bolded.